TAXANAHA DHAXALREEB IV/2007
Oktoober 2007 Ponte Invisibile Ed.

# *Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"*

# Maansoyahan mudh baxay!



**Axmed Aw-Geeddi**

**Khaalid Jaamac Qodax**

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga kor ku magacaaban oo laga xidhiidhi karo qodax02@gmail.com.**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabacday Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE Publishing Group
Oktoober 2007 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay*.

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka*.

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal*.

[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
*Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?*

[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
*Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.*

[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
*Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed.*

[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
*"Dhulgariir" waa digniin culus*

[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"
Maansoyahan mudh baxay!

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

**HORDHAC:**

*Alle ayaa mahad leh,*

*Waxa aan idin soo gudbin doonaa qoraal kooban oo aan ka diyaariyay, suugaanta abwaanka weyn ee da'da yar, ee abwaan Axmed Aw-geed "Dheerraad". Ugu horreyn waxa aan si kooban idinku soo gudbin, taariikhda abwaanka, waxa aan dabadeed si mug leh ugu hakan doonnaa, qaybaha ay ka kooban tahay suugaantiisu. Waxa aan sharraxaad idinka siin doonaa taariikhdii suugaantiisa. Waxa aan haddana ku hakan in aan dul istaago suugaantiisa, una kala horraysiiyo sida ay u kala horreeyeen, waxa aan idin dhex galin doonaa hadba suugaanta abwaanka, suugaanta kale ee ay wadaageen abwaanada kale, sida hal-qabsiga abwaanka ee abwaanada kale, soo nooleynta hees hawleedyada, iyo sida ay uga simman yahiin abwaanada kale. Waxa aan gunta iyo gaba-gabada idin soo gudbin suugaan koo-kooban oo uu leeyahay abwaanku, waxaanan ugu dambeynta qoraalkan kooban aan idinku bushaareyn bushaaro fiican oo idin soo socota*

*"Axmadow nin dheeraad sitoo dhiibsan baad tahay'e*
*Tu kalaad u dhaaftaa markaad dhaliso tii roon'e*

*M.I.Warsame "Hadraawi"*
*Dhul-gariir May 2007 Hargaysa*

Ila garateen in uu yahay abwaanka uu Hadraawi ku hal-qabsanayaa abwaan mudhay, oo suugaantiisu ka tis-qaaday dhammaan gobollada lagaga hadlo af-soomaaliga. Haddaba haddii aan si kooban uga hadlo taariikhda abwaanka waa sidan hoose:

Ahmed Aw Geedi "Dheeraad" waxa uu ku dhashay magalada Berbera ee gobolka Saaxil sannadkii 1966kii.Waxa uu ku bar-baaray magaalada Hargaysa, halkaas oo uu waxbarashadiisii dugsiga hoos/dhexe iyo saraba uu ku qaatay, ilaa haddana daggan yahay.

Axmed yaraantiisiiba suugaantiisu waa tis-qaaday, waxaana laga xiisayn jiray goobaha waxbarashada, oo uu ka bilaabay suugaantiisii hore, ama uba ahayd bar bilow. Waxa uu Axmed isaga oo yar uu ka qayb gali jirey tartan aqooneedyadii loo samayn jirey dugsiyada .1985-kii ayaa isaga oo dhigta dugsiga sare ee Gacan libaax ee magaladda Hargaysa uu ka qayb galay tartan aqooneed suugaaneed oo loo qabtay dugsiyadii sare ee wakhtigaa jiray sida: Gacan libaax, 26 Juun, Maxamuud Axmed Cali, Cumar Binu-khadaab(Dugsigii Masaarida),1da Julaay, oo boodhin ahaa, dugsigii farsamada gacanta, Xalane oo farsamo gacmeed ahaa. Haddaba waxa uu Axmed Aw-geedi ka mid ahaa ardaydii laga soo xulay dugsigiisa. Waxa uu Axmed dugsigiisa u sameeyey suugaan badan, waxaanay taasi keentay , in hees ka mid ah uu dugsiga sare ee Gacan libaax uu ku galay kaalinta koowaad, waxaana layaab! Lahaa heesta uu dugsigu kaalinta koowaad ku galay oo arday da'daa ahi uu allifay. Heestaasi waxa la yidhaahdaa"*Hay-huruufin waliggaa*", inta aynaan u galin taas aan ka horraysiiyo, heestii labaad ee uu sameeyo isaga oo arday ahaa. Heestiisaasi labaad waxa ay si toos ah uga hadlaysaa aqoonta iyo qiimaha ay leedahay. Waxa la yidhaahdaa "*AQOON*", waxaanay ka mid tahay heesaha caanka ah ee abwaanka. Haddii aan tuducyo ka mid ah idin xasuusiyo waxa ka mid ahaa sidan:

"Arday waxaannu nahay,

Aqoontiyo cilmiga,
Lagu ababiyoo,
Asluub iyo dul-qaad,
Eebe siiyayoo,
Ummadooda dhammi,
U asxaan faloo,
Ku adkeystayoo,
Lagu wada ogyee,
Ubaxii dalkoow,
Ubadkii dadkoow,
Indhahii dantow,
Ma abaal gudnaa,
Awar-ba awar-ka hore,
Inta uu socduu,
Kan danbana ogyoo,
Ku itaala-yaa,
Niman-yahow aflaxay,
Aarankaa kiciyoo,
Jiilka imanaayaba,
Ma tusnaa awood ,
Dhabbo aayo wacan,
Ubaxii dalkoow,
Ubadkii dadkoow,
Indhahii dantoow,
Ma abaal gudnaa.

Hees ama gabay uu allifo abwaanku waxa ugu horreysay sida uu ii sheegay, heesta la yidhaahdo. "*Hay-hurruufin Weliggaa*", heestani waxa ay ka mid ahayd, heesihii uu tar-tanka uu ku galay dugsiga sare ee Gacan libaax ee uu abwaanku dhigan jiray. Sidoo kale waxa ay ahayd heestii uu kaalinta koowaad ku galay dugsiga Gacan libaax tar-tan suugaaneedkii la qabtay sannadkii 1985kii. Heestan waxa ku jira laba beyd oo odhanaya. "Hay huruufin weliggaa, Hayna hiifin gacalooy, Haye nabad walaaleey".

Waxa uu noqday beydkaasi hal-qabsi ay adeegsan jireen wiilashii wakhtigaasi, waxaana la odhan karaa waa hal-haysyadii caanka noqday ee duugoobi waayay, sida ay ii sheegeen dad badan oo dugsiga dhigan jiray iyo kuwa kaleba.

Heestaasi waxa ay ka mid ahayd tii uu kaalinta koowaad isku soo taagay dugsiga Gacan-libaax isaga iyo dugsiga kale ee Maxamuud Axmed Cali. Guntii iyo gabab-gabadii waxa ay guushu raacday dugsigii Gacan-libaax, waxaana uu dugsigu ku guulaystay heestii Axmed Aw-geedi ee jacaylka ahayd oo ahayd wiil iyo gabadh isku cel-celinaaya. Haddii aan iyadana bal idin xasuusiyo tuducyo ka mid ahaa waxa ahay ahayd:

*WIILKA*:
"Haween waa lugooyoo,
Ma hantaan geyaankood,
Haydaar kama xishooddaan,
Adiguna haweeyaay,

Axdigii haleysoo,
Ka hadaaftay wacadkii,
Hurdo seexan waayoo,
Ma hadhsado dharaartii,
Adigaan ku haybshaa,
Hay huruufin weliggaa,
Hayna hiifin gacalooy,
Haye nabad walaaleey,
*Gabadhii:*
Hooyadii ku dihatiyo,
Haween waa hantiyo maadh,
Ha hilmaamin maandhow,
Dhan kale halyeeyoow,
Goor-maan heshiinoo,
Haasaawe meel dhigey,
Naf hawaawi booddaay,
Hurdo seexan weydaye."

Quruxda ay leedahay heestu, uma baahna fasiraad badan, waxase aad ka dhadhansan kartaa qiimaha uu abwaanku u yeelay dhaqanka iyo xishoodka. Runtiina heesaha jacaylka ah ee noocaasi oo kale ahi waa kuwa ugu qiimaha badan ee soo mara dhagaha iyo maqalka dadweynaha.

Axmed Aw-geedi waxa uu ka mid ahaa mujaahidiintii ka soo qayb galay halgankii dheeraa ee dib u xoreynta dalka ee ay **SNM** hormoodka ka ahayd. Waxa uu in badan ka maansoodey dhacdooyinkaasi, waxaanad dhammaan ka arki doontaa maansooyinka halganka ee abwaanka, sida uu halganku ugu dheeraa. Waxaanu in badan joogey xarumahii SNMta, waxa ay arintaasi u sahashay in ay is bartaan abwaanno, aqoonyahanno, siyaasiyiin iyo dadweyne faro badan.Waxa uu Axmed ii sheegay in ragga sugaanyahannadda ahi ay la garab taagnaayeen qiimeyn, toosin iyo taageero badan curinta suugaanta, waxa aan ka xusi karaa dadkaasi sida uu ii sheegay abwaanku in ay ka mid ahaayeen sidan:

**Boobe Yuusuf Ducaale**
**Ibraahin Sh. Muuse Wacays**
**Xasan Guure Jaamac**
**Rashiid Sh. Cabdillaahi "Gadhweyne"**
**Muuse Axmed Saxar**

Intii halganku socday waxa uu curiyay abwaanku gabayo, heeso iyo suugaan hor leh, waxaanay sugaantiisaasi caan noqotay halganka dhexdiisa ka dib markii la saaray oo dhagaha **SNM**ta iyo dadweynuhu aad u jeclaysteen Heesihii Axmed ee laga saari jiray Idaacaddii **SNM**tu lahayd ee la odhan jiray **Radiyo SNM**, ee ku taalley **Baligubadle**. Waxaana ka mid ahaa heesaha wakhtigaa aadka loo jeclaysan jiray ama gabaygaba."**Qudhaanjo, Dhuux Sarkaal, Dad-qal, Cir-jiidh, Guubaabo, iyo Bakayle".**

Haddaba, haddii aan mid mid, u kala qaadno suugaantaasi qaaliga ah, waxa aad ka dheehan doontaa sida uu halganku ugu dheeraa abwaanka iyo hogo-tusaaleyn ta uu mar walba la daba taagnaa mujaahidiintiisa iyo dadweynahaba.
Maansada Qudhaanjo, waxa ka mid ahaa tuducyadan:
"Adiggaa qudhaanjooy,
"Qol-qollada wareegoo,
Quud waxii la saydhaba,
Qaybtaada qaatee,
Quruummaha Carbeediyo,
Kuwa qaaradeeniyo,
Qarbigaba baryaayee,
Qoollaaligaagiyo,
Qara-faysigaagiyo,
Qatanaantu badanaa,
Ummadahi qatoobee,
Miyaad quusan kari heyn,
Hadba daasad qaadoo,
Halkii qiiq ka baxayiyo,
Hal la qaley is qoor taag.

Sida ka muuqata, maansadan Qudhaanjo, waxa uu abwaanku inoo sharraxayaa, tilmaan cadna uu inaga siinayaa, qaabkii ay u tuugsan jirtey, una baryi jirtey dawladaha kale dawladdii kali taliska ahayd ee **Maxamed Siyaad Barre**. Sida ka muuqata waxa uu sawir cad inaga siiyey in ay xukummaddaasi ku tiirsanayd in ay sugto uun deeqo loo soo waarido.
Dhanka kale haddii aan iyadana tuducyo ka mid ah inoo soo qaado Maanso ka mid ah kuwii halgankii dheeraa ee laga sii deyn jirey Radiyo **SNM** waxa iyaduna caan ahayd oo qiimaheeda aan ilaa hadda la illaabin Maansada magaceeda la yidhaahdo "*Bakeyle*", haddii aan tuducyo ka mid ah iyadana idin xasuusiyo waxa ka mid ahaa:

"Adigaa Bakeyloow,
Baqe geed ku dhuuntoo,
Naf la baydadaayee,
Baarruudan qarraxdaan,
Beerka u dhigaayoon,
Wed ku beegso leeyahay,
Bi'iwaaye ma ogtahay,
Burkii aad galeysaa,
Cadaawahu u bu'ayaa,
"Boqorkii ugaadhow,
Lama baraq nuglaadee,
Birmad iigu deeqoo,
Biciidkiyo dibtiigii,
Cawshan bananka tooreyn,
Ama goodir Buurreed,
Bah intaad wadaagtaan,
Guutooyin soo bixi,

Iyo gaasas xoog badan
"Axdi lagama baydhoo,
Ballan lama fudeydshee,
Marka buunku yeedhee,
Safeyn loo ballaadhee,
Habar wacasho badatee,
Boobuhu san-qadhayaan,
Tagoogtada buuxdiyo,
Laxaadkaaga baaluqay,
Dakhso iigu soo biir,
"Baashaha an derisnoow,
Adigeys ka baaddoo,
Boholaha ku daahee,
Waa horuu baraarugey,
Badi habar duggaagoo,
Qabsoo boowe haaduna,
Igalama bakheyline,
Kolaan baaqa sii faro,
Waajibkood ka soo Baxe.
"Waaryaa baahi laawow,
Baliyadaad cabeysiyo,
Doogaad u baratoo,
Colaad kuma bilaatide,
Bilad aan ku siiyoon,
Dhaqso kuu bogaadshee,
Inta aad badheedhaan,
Adigiyo ba' ceeb laba,
Bar-barkayga soo dega.
"Waaryaa booda dheeroow,
Markaan libinta bo'ganee,
Ragga kala baqoolee,
Cadawgeenu baaba'o,
Weynu tegi badhii Herer,
Adna boqol ku qaybow,
Beertii xorriyadiyo,
Toga baalihiisaad,
Baashaali doontaa"

Sida ka muuqata tuduca ugu dambeeya ee maansadan Bakeyle waxa aad ka dhadhansan kartaa saadaalin wacan oo Ilaahay rumeeyey oo uu Axmed Aw-geedi sii saadaaliyay in dalka la xoreyn doono oo bash-bash iyo barwaaqo la heli doono.

Dhanka kale inaga oo aan wada dhammayn karin suugaantii qaaliga ahayd ee uu Axmed halganka ka tiriyey, ayaa waxa aynu haddana ku yar hakan doonaa mid ka mid ah Maansooyinkii wakhtigaa halganka oo maskaxda iyo maanka aan wali ka go'in. Waa maanso, runtii aad ka

dheehan doonto waddaniyad iyo toosin, ama durid uu Axmed Aw-geedi duraayo nidaamkii dawladeed ee wakhtigaa jiray. Maxamed Xuseen Maxamed Rodol, oo ay abwaanka isku kacaan iyo dugsiba ahaayeen ayaa ka codsaday abwaanka, inuu bal gabay tiriyo uu ku duraayo kali taliyihii Siyaad Barre. Axmed kuma qaadan in uu wax badan soo qalab urursado ee waxa uu tiriyay maansadan la magac baxday "*Dad Qal*" oo iyada lafteeduna laga sii daayey Idaacaddii **SNM**ta, waxaanu Axmed yidhi:

"Saaxiibkey ma duuloow,
Haddaad gabay dareen liyo,
Maanso duuga jeceshahay,
Rag baa araarta daajoo,
Eebe Hibo dul dhigayoo,
Duniduba ogsoontahay,
Dur-dur waa Hadraawoo,
Sida malabka doocaan,
Dareenkiyo shucuuraha,
Dad-weynaha u saamee,
Hadduu daaha soo roggo,
Daw dhaaf ma yeeshee,
Debed-yaal bal soo dhugo,
Eebahay ha daayee,
Gaarriyaa ka daranoo,
Sidii damal hadhweynbey,
Shaacirradu dugsanayaan,
Da'da maanta joogtaa,
Abwaanimo u doortoo,
Duqa gabayga weeyee,
Derejana ku sii ladhan,
Aniguna ku dayashada,
Maansadeydu waa door,
Digtaatoori waw nacab,
Iyo fulle damaaciya,
Kaligii daneystaha,
Dhanka kalena daawiyo,
Dugsi ay u hoyatiyo,
Dawan ay ku toostiyo,
Danyar waw sed iyo calaf,
Danta guud waxaan heyn,
Dibnahayga uma furo,
Afartaa dalaan dali,
Dooraya mid kale doon,
"Saaxiibkey ma duuloow,
Qabsoo sidigti doolaab,
Dib jir bay ku maqan tahay,
Doobkii jiraayaa,
Damiin xoolo seegiyo,

Doqon lagu hungoobiyo,
Duuf laal wareegiyo,
Noqdey curad dabayshadey,
Dugul waxa la maalaa,
Markay daad madheedhiyo,
Dalsan ay ku fooftee,
Gaaroodi dixi badan,
Aasheed u daaqdee,
Marka ay diraacdiyo,
Tahay duraha jiilaal,
Ay dhanaha doontana,
Dar mijoole loo xidho,
Doorkay abaahoon,
Waxa loo dir-soocaa,
Rati doobta laliyee,
Dameer bay u tu'iyeen,
"Saaxiibkey ma duuloow,
Dawladi ma taagnee,
Budh-cad wada dilaaliyo,
Dabataa u talisoo,
Magaceedii wuu dumay,
"Saaxiibkey ma duuloow,
Ciidankii dalkeenee,
Darajada lahaan jirey,
Dad-weynahay xasuuqaan,
Dur-duraday sumeeyaan,
Iyo daaqa xoolaha.

Dhanka kale abwaanku waxa uu in badan ka maansooday, heeso door ahna ka tiriyay sidii uu u dhiiri galin lahaa **SNM**ta iyo dhammaan taageerayaasheeddii oo dhan, isaga oo si gaar ah ula hadlaaya **SNM**ta waxa uu ku muujinayaa heesta "*Guubaabo*", dar-daaran badan oo uu u dar-daar warinaayo mujaahidiinta, waxaanu u sheegayaa in aan laba maalmood la dhiman ee hal maalin la dhinto, in aad geesinimo ku dhimataan ay tahay ta ugu fiican adiga oo hor ilaahay dadkaaga doonaya inaad uga saarto cabudhinta iyo dilka lagu hayo, haddii aan tuducyo ka mid ah soo qaato heestan Guubaabo, waxa aad ka fahmi kartaa aqoon dheerida abwaanka waxaanu yidhi

"Ilaaha wax dillaa,
Cid deyn maayoo,
Naf taada daqiiqado,
Dib looma dhigee,
Fulow ha didinne,
Shahiid dirrir,
Imisaa diric galay,
Dagaal kululoo,
Hadana saxar daarin,

Deeqow,
Imisuu wedku dilay,
Nin daar ku jiroo,
Dawaaftey naftii,
Hurdada dakhar,
Imisaa nin darwiisha,
Duub cad xidhoo,
Jidbaale ka doogey,
Dib u nool,
Imisaa duunyadii,
Nin daaq kula maqan,
Daluun ku dhacoon,
Dib loo arag,

Waxa jira maansooyin qiimaha ay leeyihiin aan la sheegi karin. Dhibkii, qaxii, boobkii, fadhatadii, dilkii, kufsigii, cabudhintii, cadaadiskii, xasuuqii, bur-burkii, jabkii iyo halaaggii ummaddani soo martay ayaa waxa uu abwaanku ku muujinayaa maanso qaali ah oo la yidhaahdo '*Wali dunida kama dhicin*" Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad" waxa uu sawir toos ah kaa siinayaa sidii dhaca, boobka iyo dilkaasi ahaa, waxa uu sawir cad kaa siinayaa sidii arrini ku dambaysay. Wali dunida kama dhicin runtii intii aan akhrinaayey maansooyinka Axmed Aw-geedi waa tii iigu dareenka cuslayd, waxaanad dareemaysaa marka aad akhrisanayso aqoonta kaa maqan ee uu sida fiican kuu dareensiinaayo abwaanku. Waayo, haddii dhallinyaro badan oo intii ka dambeysay dib u la soo noqoshadii xorriyada Jamhuuriyada Somaliland dhashay la waydiin lahaa bal dhibkii uu dadka iyo dalkani soo maray, waxa laga yaabaa, in ay in yar kaaga sheegi laahaayeen uun. Haddaba Axmed Aw-geedi ila eega maansadiisa wali dunida kama dhicin tuducyo ka mid ah:

"Xilliyada is doorshiyo
Waayaha is daba mara
Filimada la daawado
Maxaa daaran maantana
Fiintu danantey dhiillada
Galawgaa ka sii daran
Dinaahyee waraabuhu
Deyn waa waraaqii
Cabsi weeye duniduna
Daarihii badh baa dumay
Badhna way daloolaan
Badhna wayba duugmeen
Badhna way dayaameen
Badh dabaa ku baxayoo
Holoc bay ku dareen
Laye dhiig dadbaa wadhan
Xinjireys dalaalayn
Maydbaa is daba yaal
Eey baa durduurtiyo

Xuuriyo digaagado
Laye madax dadbaa qalan
Kun la dooxaybaa jira
Kuman daab-cad lala dhacay
Kuman obocdu daba taal
Xabaa luhu dul iyo hoos
Daafaha magaalada
Kaga badan dareemada
Laye dhaawac baa deden
Is dul buuxshey kaymaha
Kuwo duubabkaa go'an
Kuwo feedhahaa dumay
Kuwo daamankaa jaban
Dadku way qulqulayaan
Dawyadaa la marayaa
Jid siraad dushiisii
Waayeel duqooboo
Socod deyrshey waa hore
Daa' imo carruureed
Dumar weer-cad loo xidhay
Diif iyo xannuun qaba
Daaniyo miskiin keed
Debedyaal la wada noqey
Dushay milic ka haysaa
Iyo durihi jiilaal
Baraf baa ku soo degi
Deyro dhaaf kalkiisii
Waxa yimi diyaarado
Miig guuxa laga dido
Dangaraaradii sii
Durba jiidh dadkoo wadhan
Daadi haamuhu siday
Daafkiyo rasaastii
Durba geeri loo baday
Marku waagu daalacay
Madaafiic dilaan tiyo
Hawsar laysu soo dumay
Ku duqeeye maatida
Dabre oo ku laba celi
Dabar gooya lays yidhi
Laye kaare doobyaa
Dhashiikaha dul iyo hoos
Dooyada ka laba celi
Laye jiibka dananaa
Daran doori yool baadh

Laye suu kula da’ ayiyo
Shilke dhamacda daadshiyo
Boobayaal wax duugaa
Dadweynaha dhabaan dhebe
Odayaal dayoobiyo
Dumar foolanaayiyo
Curyaan taagi dabartey
Gidaarada ku dumiyeen
Kuwo duub-cad qaatiyo
Waxa yimi daraawiish
Iyo darab nijaaseed
Doox-dooxe maatida
Mar labaad dadkii qaxe
Cagta saare dawgii
Habaqluhu is daadihi
Isma dayato loo badey
Dirgan waa carruurii
Badh dariiqa lagu dhaaf
Dacaskiyo rafaadkii
Wax lays daba qamaadaba
Daa-duun ku tage meel
Aanu aadmi weli degin
Filimkii dib ugu noqo
Iyo daahi koowaad
Ogow qaar dagaagaa
Furanaaya daahyada
Kuwo kale dukaan bey
Wixii yiil daldalayaan
Kuwo kale daqiiqbay
Sidii daaniyoo kale
Dacalada ku qaateen
Kuwo daasad maangiyo
Niidoo dalooshamay
Ayey sii duduucdeen
Qaar sariiro duugey
Genaw duud xamaasheen
Ogaw qaar dab liqeybaa
Duraaxadii masjiidada
Guranaaya deeqaw
Ogaw gaar duf qababaa
Dusuudiyo iyo Bilaydhiyo
Duruuc iyo malkhabadiyo
Dahabkii haweenkiyo
Maryo xool dul saaraa
Duuduubtay oo raran
Ogow booli daaq yaa

Naf siday u doojaan
Hadba dabaq koraayoo
Faganaaya daaraha
Kansigii daboolaa
Maalkii dadweynaha
Dirham iyo danaaniir
Doolaar kamay tegin
Ogow daabax baa tuban
Kun wedkii diyaar u ah
Daday soo qafaasheen
Wegen laba duble u xidhe
Baroon dabada loo qabay
Wegan kale la soo dumay
Iyagana la dooxdoox
Wegen daabcad loo qaad
Wegen kale dawaar mari
Wegen kale dalqada dhige
Dhamidood la dabar goo
Dahoo Aakhiro u dege
Cagaf baana duugtee
Tolow duudsi may noqon
Hada degelku waa herer
Dooxadii hargeysaad

Haddii aan idinka yar dhex gallo, waxa uu hadda abwaanku si kale inoogu sawirayaa in waxii ka dhacay gobollada waqooyi ee Soomaaliyadii hore, haddana ah Somaliland aanay ka dhicin, waxii ka dhacay dunida inteeda kale. Taariikhda laguma hayo dayuurad magaaladdii ay ka kacaysay haddana rushaysay sida ka muuqata maansada, taas iyo kuwa kale oo badan oo aan dunida ka dhicin ayaa uu si toos ah inoogu sharraxayaa abwaanku, haddii aan sii wadana waxa uu yidhi:

"Wali dunida kama dhicin
Dawlad maatideedii
Kaare dalun dulceeyiyo
Madaafiic dillaantiyo
Ku duqaysa maadhiin
Wali dunida kama dhicin
Dawlad maantideedii
Hub is daadaheeyiyo
Diiradliyo gamuuniyo
Ku daqiiqda Naabaal
Wali Dunida kama dhicin
Dawlad maatideedii
Subax mooro duugtoo
Guryahoodi dumi soo
Rabta iney diboodaan

Wali dunida kama dhicin
Dawlad maatideedii
Ciidankii dalkoodiyo
Daraawiish ku saartoo
Ku dabaasha haawey

Wali dunida kama dhicin
Dawlad maatideediyo
Oor yaheeda dooxdoo
Dhalaankeeda dubatoo
Dabar goysa waayeel
Wali dunida kama dhicin
Diyaaraad ka caayoo
Gegedey ka duuleen
Dib u guba magaalada
Iyo dagaladoodii
Waxaan dunida soo marin
Dar Allee anaa qaba
Dangaraaradii shalay
Dakhar kaa anoo qaba
Ninka igu diganayee
Maanta dadabta ii galay
Daacad ugama jeedee
Dadaw waxaad tidhaahdaan
Demmen waxay ku leedahay
Dawliil na yara dhawr
Inay dunidu yaab tahay
Nina daduu gumaystiyo
Saldanuu u dudayaa
Anna ina darwiishow
Waxaan doonayaa nolol
Nabarka i damqanayaa
Hadal kuma dawoobee
Saw inaan dagaalamo
Maaha dawga keliyee
nin i deyrshey ii dhigey
Dacwadeydu maantana
Waxay daaran tahay waa
Saxaraw nin ii daran
Dub u eegan maayoo
Daawo nama dhax taalee
Maye danaba deenii
Wiilashii diraan jiray
Kici door labaadkii
Ha sabayso doontuye
Doorashiyo asxaablaw

Digtoonaw rag waa kane
Walee doolo loo guur
Duulaan la heensee
Walee dooyo tarantiyo
Col weynuhu is deydayey
Walee dogobyo noolee
Raggii daalanaan jiray
Dunqulaalka laba geli
Walee geedkan dararaye
Dirirada ka maarmaye
Dur-dur aan go'ayniyo
Wabi diiqalyeey iyo
Dooxo lagu waraabshee
Yidhi wiil ma dumi karoo
Danab wuu ku soo dhici
Walee daba ka naaxyada
Danyaraha ka loogtaye
Deyn hore ku maqanyahay
Waran kayga waan dari
Walee darab nijaasyada
Dhiigii dad weynaha
Dardarsaday wadaamaha
Dhunkaal waan durduursiin
Walee fooqyo dahabiyo
Raga daaro dhiibsaday
Soo dega marwaan odhan
Mid durbaan u qaadiyo
Mid kalay dirtaan iyo
Kuwa sida direyskiyo
Dibi taatiyaashiyo
Kuwa toban dubleeyiyo
Dalan dooliyaa iyo
Daaniyaha barwaaqada
Ku dabaalanaayee
Dardarsaday wadaamaha
Walee faqash dadkeedii
Daaduumo waan odhan
Afartaa daleeyaye
Dacwad kale waxay tahay
Walaalowga duun ka ah
Dadka wada dhaqnaatii
Iyo dubu hashiisiin
Qaran digadhigii sii
Waa faral dushayda ah
Iyo waajib ila da'a

Duco aniga lay faray
Wahe Aaran dubataa
Isma hura damqaysoo
Dab dhexdooda gelisee
Daacadiyo wadanigii
Haday digigaxoodaan
Rag baa daawadii xidhi
Duuf laalayaaliyo
Dawac iyo abeesiyo
Dacay iyo nin liitiyo
Dalka niman u dhalan iyo
Dufan jecel basaastaa
Ayaa dalawadeenii
Afka duhur ku maaloo
Sinjigeeda doorshee
Hadduu doorkan maanta ah
Nin geyaa u dadab galo
Way u doonantee garo
Dubu naqodka sheekada
Taariikhda duuga ah
Daraad iyo wixii dhacay
Dacarey shilkeedii
Dakharada lafoobiyo
Nabarkaan damqaayoo
Demmen waxaan is leeyahay
Ha dagaalantee kici
Dul ahaan dadkeeniyo
Inta diir madoobee
Xoolo daaqsaney see
Caro edeg dul joogtaan
Farta boog u darayoo
Dadka waxan ogeysiin
Inu dulinku ruux yahay
Dawaduna iyaga tahay

Mar kale haddii aan idin ka dhex galo Maansadii Wali dunida kama dhicin, waxa aad inta dambe ku arki doontaa oo abwaanku si qoto dheer inoogu sharraxayaa in dar-daaran uu u jeedinaayo raggii dhibkaasi gaystay, iyo waliba inta aan sida fiican u fakiraynin ee aan dhibkii dalkan iyo dadkani soo mareen aan waxba u arkaynin, waxaanu yidhi:

"Ila durugtay sheekadu
Tolow aan dardaarmee
Dhahar iyo dirkiisi
Dhego maw daloolaan
Ninka Daacad quudhsadey
Nabsi buu dur-duurtaa

Ninka maati duudsiyey
Markaluu ka deyn bixi
Nin durduriyey aashii
Wuxu daaqayaa halis
Ninka belo ku daakirey
Isagey dumaanshaa
Sidigtii nin daayacay
Isna caydh la daaduun
Ninka damac hogaanshaa
Sharaf way is daayaan
Nin adduunyo daba galay
Way danbaabidhaa jeer
Madaxnimo nin deydayey
Keligii dabely raac
Dhilow yahankan dararoow
Geed kaad dul saareyd
Soo deg buu ku leeyahay
Dooni qaranku leeyahay
Jiirkii dalooshoow
Inaad degi ka faalood
Dinad yahay libaaxiyo
Aarkii dabooliyo
Dawri baad is moodee
Haddii laysu duurxulo
Ogow habardugaagii
Dunta boqorka kugu xidhay
Markay duub amaaniyo
Xilka kaa dilaacshaan
Duleed xaabiddaadiyo
Dooli aad shidhaysiyo
Dabataad ku noolaan

Axmed Aw-Geedi, kaliya kuma koobnayn in uu gabay ammaan ah uun tiriyo, waxa u dheeraa in uu tilmaami jiray tusaalena ka bixin jiray, waxii uu dhalliil u arko ee wakhtigaa jiray  Waxa uu in badan ammaani jiray **SNM** iyo hawgalladeedii aadka u layaabka badnaa. Dhanka kalese waxa uu sheegi jiray waxii dhalliil ah, oo kama gaban jirin in uu sheego dhalliisha wakhtigaa jirtay, si ay toosin ugu noqoto. Waxa uu ka tiriyay maansooyin badan, runtiina markaad eegto dhammaantood maansooyinkaasi waxa aad ka dhex  arkaysaa in uu wax badan uga digaayo hoggaankii **SNM**, una sheegayo haddii waxaasi ay sameeyaan aanay fiicnayn. Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa "*qof wax ku siiya waad heshaa balse qof wax kuu sheega ma heshid*". Haddaba haddii aan soo qaadanno maansada caanka ah ee "*Dhab u Hadal*", waxa aad dareemi doontaa xikmadda iyo waayeelnimada ku qontanta erayada abwaanku uu adeegsanaayo, runtiina waa kalmadaha wakhtigan casriga ah la yidhaahdo waa erayo Diblomaasiyadeed. Si kastaba ha ahaatee,  hadal

lama ag is taagee. Haddii aan idin soo gudbiyo tuducyada ay maansadaasi ka kooban tahay waxa ka mid ah sidan:

“Xildhibaanadeydoow,
Kuwii dhaanka loo diray,
Ayaa ceeb ku dhaashtoo,
Dhexda awrkii kaga lumay,
Xilka waxaad u dhiibteen,
Raggii dhahar wax soo baray,
Baha dhidar shirqoollada,
Marba dhaante noo tume,
Dhaameel mar noo lule,
Marna dhuurta noo shiid,
Iyo dhiro qallaadeed,
Dadkoodii la soo dhacay,
Intey kala dhaqaajeen,
Wahe! Jiliba meel dhige,
Ciidamadan is dhinacyaal,
Ardaa dhaw ardaa dheer,
Dhumucdeydi lagu wiiq,
Ciidan booli dhaadhiya,
Ma dhamaado duullaan,
Jigruu laba dhac waa nool
Misna guul ma dhalinnoo,
Halkeenii ma dhaafnee,
Xageebey ka dheeliday,
Markaan faqash dhirbaaxaba,
Ama gool ka dhalliyee,
Dhulka baac xorreeyaba,
Dhaqsaa looga guuraa,
Dibaa loo dhadhaaraa,
Dheri aan bislaaneyn,
Malaa dheysa weyntaa
Dhiigga geesigeygiyo,
Dhimashada ku naaxdoo,
Gaanahawgu dhiiqee,
Aniga waygu dheeryiin,
Dhamacow raggii go’ay,
“Xildhibaanadeydoow,
Dhab markaan u fiirsaday,
Een dhex galay dadweynaha,
Dheg mugeed waxaan helay,
Kuwii hore ma dhaantaan.

Feeberweri 20 1982kii, waa maalin ku suntan dhiigga dhallinta reer Somaliland. Waa maalintii uu dhacay dhagaxtuurkii ugu weynaa ee soo mara taariikhda xukuumaddii kali taliska ahayd,

lagaga soo hor jeedo. Dhammaan dhagaxtuur kaasi, waxa hoggaankiisa hayey dhallinyarada, ay hor kacayeen ardaydii dugsiyada sare ee dalku. Dhagaxtuurkaasi, waxa uu dhacay ka dib markii aqoonyahanaddii **UFFO** la horkeenay maxkamaddii kelitaliska ahayd ee Maxamed Siyaad Barre ka amar qaadan jirtey. Haddaba sannadkaasi ka dib, waxa laga xusi jirey dhacdadaasi, dhammaan gobolada dalka, gaar ahaana Hargaysa. Axmed Aw-geedi waxa uu ka mid ahaa ardaydaasi xusi jirtey sannad walba. Sannadguuradii afraad oo ku beegan 1986kii, ayaa abwaan Axmed Aw-geedi uu munaasibad lagu xus aayey uu u sameeyey heesta caanka ah ee la yidhaahdo "*Fooraha dhacayaa ma kii Feeberweri baa*", Haddii aan tuducyo ka mid ah idin soo gudbiyo waxa ay hees-taasi ahayd sidan:

"Fasaliyo tusbaa jira,
Fadka guban ka muuqdiyo,
Fallaadhaha cad-ceedaan,
Ka sidaa farriimoo,
Way fayowday niradii,
Fooraha dhacaayaa,
Ma kii Feebarweri baa,
Fiintu waxay ka oydaa,
Fadka soo onkodayee,
Dhahar waa fakirayaa,
Anna farax daraadii,
Foolashaan daleel dhigay,
Fooraha dhacaayaa,
Ma kii Feebarweri baa,
Shan kastuu falaagiyo,
Ciidan fara leh soo tubo,
Faashiiste celin waa,
Shicib fool adaygoo,
Gobannimo u faytaye,
Fooraha dhacaayaa,
Ma kii Feebarweri baa,
Waxay fool waliisha ba,
Ama feedho guranta ba,
Duluc furatay heegadu,
Daad baa la filayaa,
Faqash dooxaday taal,
Fooraha dhacaayaa,
Ma kii Feebarweri baa,
Beebeeyo soo fuul,
Foosiyo laxaad keen,
Fura yidhi rasaasaa,
Baqan weyday fadal dheer,
Ka fashilantay xaajadu,
Fooraha dhacaayaa,
Ma kii Feebarweri baa,

Quruxda iyo farshaxannimada ka muuqata heestan Feeberweri waxa ay ku tusaysaa, sida uu abwaanku ugu dheeraa halganku, kana dhiidhisanaa hoggaankii foosha xumaa ee dawladdii Maxamed Siyaad Barre. Waxa uu Axmed sawir toos ah inaga siinayaa sida uu ahaa hogaankaasi iyo halkii uu ku dambeeyey, iyo sidii mujaahidiintii dalka u soo halgantay ugu ba-bacdhigeen ka takhaluusida nidaamkaas kali taliska ahaa

Haddii aan intaa kaga yar hakano maansooyinkii uu Axmed Aw-geedi halgankii dheeraa ee dalkan Jamhuuriyada Somaliland lagu xoreeyey uu ka tiriyay, aynu u galno bal qayb kale oo ka duwan taasi hore.

Jacaylku waa shay ay inta badan abwaanadu ka hadlaan, ha uga hadlaan siyaabo kala duwan ee, waxaanaynu odhan karnaa ma jiro abwaan ay ka maqan tahay suugaantiisu heeso jacayl ahi, ama maansooyin ku taxaluuqa jacaylka. Haddaba Axmed Aw-geedi iyo arinta jacaylka waxii uu ka yidhi haddii aan iyadana si dul ka xaadis ah u eegno. Waa mid runtii uu kaga duwan yahay abwaanada kale, sababta oo ah hadda ma jecla in la soo hadal qaadaba waxa ku saabsan jacaylkaba, runtiina waxa uu yidhaahdaa" Waa in maskaxda dadku ka kortaa erayada aan micnaha sameynaynin ee waa jacayl waa jacayl la yidhaahdo". Haddii hadda aragtida abwaanka ee jacaylku ay sidaa tahay, bal aynu eegno abwaanka iyo dhallinyaranimadiisii waxii uu ka yidhi arinta jacaylka. Aynu ku horreyno maanso caan ah oo ka warramaysa jacaylka iyo aragtidii dareen ee abwaanka iyo yaraantiisii., haddii aan tuducyo ka mid ah soo qaato maansadaasi oo la yidhaahdo "*Asaageed ka roon*" Waxa ka mid ahaa tuducyadeeda erayadan:

"Wehe aragtidaadiyo,
Ereygaad i tidhibaa,
Arami igu beeroo,
Eel aan dadaayaad,
Amranney bog dooxdoo,
Adoo iilka gaadhiyo,
Aakhiro ha joogtee,
Ifka intaad ku nooshahay,
Innaan kaa abaal dhaco,
Layga eegi maayee,
Uubateynta iga daa,
"Hablaha Ayrish joogiyo,
Soomaali idilkeed,
Adigaw koreeyee,
Asaageed ka rooneey,
Kaamaan il duufinoo,
Kola kuma ilaawine,
Ood dhacamo jiiftoo,
Awood aan u waayiyo,
Waayaha i oodiyo,
Xishood bay dabraayee,
Waqay kaama oolleen,

"Igadh geel maqaarkeed,
Kola kama ajootee,
Ahe! Waan jeclaan laa,
Oon aan wadaagniyo,
Isu ima-shadeenee,
Arinkeys tabceeyoo,
Qadarkaa adeegee,
Inaan ooyo wiilooy,
Aamus baan ka door bidey,
Iil iyo ninkiisii,
Loo kala teg aaddooy,

"Aqoon daran nafteydaay,
Afar deeqdan madiga ah,
Nin ig-dhadey ha maalee,
Haw uur guluulicin,
Midna waad ogsoonaan,
Waxaan Eebbe kuu qorin,
Afka saari mayside,
Irdho qaado weligaa,
Aasaana sii soco,

Kuma koobna maansooyinka jacaylka ahi intaasi ee uu Axmed Aw-geedi allifay, waxase hubaal ah in midiba mida kale ay ka sii wanaagsan tahay, haddii aad is tidhaahdo bal dhugo maansooyinkaas. Abwaanka lama soo koobi karo, maansooyinkiisaasi oo waa bad dhan oo burqanaysa, intase aan jecelahay ayaa waxa ka mid ah maansadan kale ee la yidhaahdo " *Turuwaa*" maansadan sida magaceedda ka muuqata waxa aad markaaba xasuusanaysaa in Jabuuti meeshu tahay. Turuwaa, waa xaafad ka mid ah xaafaddaha magaalada Jabuuti. Haddii aan iyadana tuducyo ka mid ah soo qaato, waxa aad markaaba fahmi doontaa sida abwaanku u sawirka inooga siinaayo *Turwaa* iyo gabadha uu la hadlaayo e *Tiriig*.Waxaanu yidhi:

"Adigaa Tukayahow,
Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey,
Turuwaa,
Toorin bay u qortoo,
Naftaydii toshoo,
Sidii tooja geela,
Waan tig-tignee,
"Balanbay ku tagtee,
Ha taabo gashee,
Inaad toyotaa,
Tu waajiba,
Adigaa tukeyahow,
Jabuuti tagee,

Tiriig ma ku aragtey,
Turuwaa,
"Qalbigaa tebeyoon,
U taag la' ahoo,
I tus buu i yidhoo,
I taabsii,
Tagoogta shanshadda,
Laf taageertiyo,
Tiir bay ii ahayd,
I taakulisee,
Adigaa tukeyahow,
Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey,
Turuwaa,
Toogadaan qaba iyo,
Warkey tebiyoo,
Toolmoon bal u sheeg,
Tabtaan ahay,
Adigaa tukeyahow,
Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey,
Turuwaa,
Tolbaynu nahee,
I taban taboo,
Tunkaad sidatiyo,
Laftaba tuuroo,
Adigaa tukeyahow,
Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey,
Turuwaa,

Muddo ka dib ayaa Axmed Aw-geedi oo ku nool magaalada Berbera ee gobolka Saaxil, waxa soo gaadhay farriimo badan oo sheegaya in uu ka hadho Tiriig, oo ahayd gabadhii uu ku hal-qabsanaayey, ee uu tukaha farriinta ugu dhiibaayey, ee Jabuuti joogtey. Haddaba si uu abwaanku uga jawaabo farriimahaasi, waxa uu ku war celiyay maanso kale oo iyaduna aan aad ula dhacay midhaheeda lana yidhaahdo "*Tiriig yaan la baylihin*". Axmed waxa uu heestan kale si qoto dheer inoogu sharraxayaa aragtidiisii ku saabsaneyd Tiriig, waxaanu yidhi:

"Berberaan ku noolahay,
Saaxil barasankeedii,
Waa beel nabdoonoo,
Dhallinyaro ku badantee,
Botorkiyo ciyaartaan,
Dhankey-guun ka boodaa,
"Ninka beerta caashaqa,
Ku bariisanaayee,

Boodhari ag-joogaa,
Jacayl kama bogsoodee,
Sidee baan u baajaa,
Waaba layga beerree,

"Sida bilaha iidaha,
Waxaan galabtii booqdaa,
Qabrigiisa bilicda leh,
Inta aan bariidshaan,
Boholyaw sallaamaa,
Ayaan ubax ku beeraa,

"Inkastooy i baabeen,
Dhammaan bilista xaawaley,
Waxaan door u bidayaa,
Biyo dahab la mooddii,
Bilaad kali u dhooftee,
Tiriig yaan la baylihin,
"Doonyaha badweyntiyo,
Jabuuti u baxaayaan,
Ka dhex baadhayaayoo,
Beri carab koley tahay,
Baaqa meel kasta u diray,
Balaf teedse maan helin

"*Halgankii Nolosha*", waxa ay ka mid tahay heesaha ugu caansan ee jacaylka ah, ee uu leeyahay abwaan Axmed Aw-geedi, haddii aad daalacato tuducyada heestan waxa aad ka fahmi kartaa wax badan oo aan iiga baahneyn sharraxaad inaan ka sameeyo, abwaanku waxa uu sawir guud inaga siinayaa xaawaley dumar iyo sida uu u arko. Waxaanu yidhi oo ka mid ah erayada heestan:

"Halgankii noloshaan,
Ku hawlannahee,
Haweeyaay iga daa,
Halaasiga,
Dhaaxaan ku habsaamay,
Heyb dumarroo,
Horraan uga qadey,
Hobsheyntood,
"Anaa hebdayoo,
Wadaan jin hayaye,
Ka haayirey,
Halab karuurkeed,

"Shan kastoo hogol,
Iyo hillaac u eegtiin,

Heego dheer quruxdiin,
Qalbigu ma hendedo,
“Hog layga qanniiney,
Waa horre,
Malaa kuma hiillo,
Hoyashade,
“Hoguu Cilmi yiil,
Nin baa la hadloo,
Hayaay waxuu yidhi,
Haween ka durkaay.

Dumarku kaalin muuqata ayay kaga jiraan bulshada dhexdeeda, la'aantood na ma suurtowdeen dunidu. Waxa jira maansooyin badan oo abwaanku uu ku muujiyay kartida iyo waxqabadka dumarka, waxaanu si gaara ugu dheeraaday in nolosha ay ka yahiin kow. Maansadan "*dumar waa ma dhaafaan*", waxa ay ka dhalatay qiso xan ah, oo aakhirkii soo gaadhay abwaanka. Sheekadaas uu helay abwaanku waxa uu kaga jawaabay maansadan. Nuxurka maansadan waxa aad ka dheehan doontaa qiimaha dhabta ah ee ay leeyihiin dumarku, iyo halka uu ka taagan yahay abwaanku. Waxa kale oo abwaanku Eebbe ka baryayaa in uu siiyo gabadh wanaagsan dhinac walba. Waxa ka mid ah erayada maansadan"

"Haween maxaan ku diidaa,
Ama kaga durkaa tolaw,
Sowtay doraad galab,
Anigoo itaal daran,
Dabka ii shideenee,
Ina soo dugsiyayeen,
Haween maxaan ku diidaa,
Ama kaga durkaa tolaw,
Sowtay laf duudkiyo,
Dusha sare i saareen,
Dhabarkii daloolshamay,
Cududuhuna daaleen,
Haween maxaan ku diidaa,
Ama kaga durkaa tolaw,
Sawtay daleeliyo,
Diif iyo laleemiyo,
Dacas iiga dhaasheen,
Sareedana i daajeen,
Haween maxaan ku diidaa,
Ama kaga durkaa tolaw,
*Sawtay gabaan dihin,
Intey doobi qaateen,
Dabeed ii gobsheeyeen,
Buqul iiga duugeen,
Dunji dhalanka waayaha,
Hayaanadii isdaba joog

Wixii daal la soo maray,
Dadaal kuu rag soo galay,
Dumar baa kabaayoo,
La duduucay hawshii,
Nin kastoo dal qaataba,
Dumar baa bar-baarshoo,
Nin kastoo dadnimo leba,
Dumar baa kabaayoo,
Nin kastoo bah deeqaba,
Dumar baa kal-kaaloo,
Nin kastoo la doortaba,
Dumar baa u hiishoo,
Nin kastoo hal-dooraba,
Dumar baa u hiil galay,
Haddaan dumar abuurayn,
Dadku may tarmeenoo,
Haddaan dumar abuurayn,
Dirba muu jireenoo,
Haddaan dumar abuurayn,
Farac muu durkeenoo,
Haddaan dumar abuurayn,
Duug muu hadheenoo,
Haddaan dumar abuurayn,
Lama kala dab qaateen,
Dugsi laga aflaxo iyo,
Waa deris ma dhaafaan,
Dunji lagu arrooriyo,
Dun tafiiran weeyaan,
Degel lagu nagaadiyo,
Gallad weeye lagu dego,
Damal lagu nasanayiyo,
Waa deeq Rabaaniya,
Sideebaan u diidaa,
Sideebaan u daayaa,
Sideebaan u deyrshaa,
Sideen uba dagaalaa,
Dumar waa madhaafaan,
Iyo duuga noloshee,
Allahayaw mid diintiyo,
Edebtaadu deeqdoo,
Derejeysa aayaha,
Allahayaw mid diiqiyo,
Duco waalid sidatoo,
Oon loo dar-daar werin,
Allahayaw mid deeqloo,

U dadaasha samahoo,
Oon didin goolmoon,
Allahayaw mid aan dudin,
Ama aan il dabinoo,
Dadku gacal u wada yahay,
Allahayaw mid ii daran,
Kaa dooni maayee,
Eebbaw mid daacada,
Ii door Allahayaw,
Midii aan ku dagi laa"

Sidaan hore u soo sheegay, laguma soo koobi karo, qoraalkan yar suugaanta uu abwaanku dumarka kartidooda iyo qiimaha ay bulshada ku dhex leeyihiin uu inoo tilmaamayo. Maansadan "*Wabiin*", waxa ay si toos ah inooga digaysaa in aan dhibaato loo gaysan dumarka, ragguna ay dhawraan haweenka xaqa iyo xuquuqda ay ku leeyahiin. Maansadu wax ay inoo sharraxaysaa dhibaatooyinka badanaaba soo wajaha dumarka, ee raggu masuulka ka yahay. Haddii aad ila akhridaan waxa aydun garan sirta ay ku fadhido maansadani. Waxa ka mid ah erayadeeda sidan:

"Raggu saw waraabiyo,
Maaha weer masuubo ah,
Dumarkuna wadeeciyo,
Hilib wadhan gadaanada,
Wahee inan raggeedaw,
Intee inan wadeeciyo,
Walbahaar ku tuurteen,
Wadankaba ka dhooftoo,
Ka dhaqaaqday waa hore,
Wahee inan raggeedaw,
Intee inan wacnaydoo,
Bulshadu u hanweyn tahay,
Wicil loo xanbaarshoo,
Nolosheedii wiiqdeen,
Wahee inan raggeedaw,
Intee qaafo weynaan,
Sida neefta weylaha,
Inta weyso jabiseen,
Geyaankeed is waayeen,
Wahe inan raggeedaw,
Intee Weris habooneyd,
Oo wegen hablaa iyo,
Wiilal doora dhali leyd,
waaxyeysateen ugub,
Wahe inan raggeedaw,
Intee geelo waafiya,
Sida walanqo ruugteen,
Wadhi raaciseenoo,

Wajigeeda dakharteen,
Wahe inan raggeedaw,
Sida roob wajiine ah,
Jartaale aan wax liileyn,
Waraq baad ku hoortoo,
Waxtarkaa nac buu jaray,
Idaha woodhbaa diley,
Geelana waraabaha,
Waaxyaa jaraa diley,
Dumarkana wabiiniyo,
Wacad qabe rifaa diley,
Hashu cuno waraabuhu,
Haadkaa ku weehdee,
Nin walow ogsoonow,
Halke aad wareentaa,
Waaxdaada midigiyo,
Wadnahaaga weeyoo,
Adigaa wax beelee,
Baqayaha walhanayiyo,
Waxaraha ban keer tuban,
Talaw yaa war kala siin,
Wada xilo bilaaliyo
Walamsade rag weeyoo,
Dumar waa wadkoodee,
Ha ku daganin wiilaw,
Manka wood ka hirayiyo,
Abris toban wajiila ah,
Weyshii hadhaa ihi,
Waraabey u halistee,
Haysu dhiibin weligaa,
Abris toban wajiiliyo,
Waadaal ku naaxiyo,
Waraabaha ka ciyay Toon

**18 May 1991**, ayaa dib loo xoreeyay oo lagu dhawaaqay in Jamhuuriyada Somaliland ay tahay dal madax bannaan, kana mid ah beesha Caalamka, haddaba si taariikhdaasi uu abwaanku inoogu muujiyo iyo dhacdooyinkii ku xeernaa ayaa waxa uu ka tiriyay maansooyin badan oo runtii qiiro lahaa.

Burco oo ah magaalo madaxda gobolka togdheer ayaa ahayd goobtii lagaga dhawaaqay in Somaliland ay tahay dal madax bannaan, waxaana magaaladaasi Burco iskugu yimid **1991** ergooyin badan oo ka kala yimid dhammaan qaybaha ama qabaa'ilada kala duwan ee degga Somaliland, haddii ay tahay kuwii **SNM** iyo haddii aanay ahaynba, waxaana dhammaan lagu soo

qaaday shirkaasi qodobo badan, oo aas-aas u ahaa abuurridii jiritaanka dalkan. Waxa ka mid ahaa qodobadii lagu heshiiyay in **SNM**tu ay dalka maamusho muddo laba sano ah, ka dibna ay gacanta u galiso maamulka shicibka, iyo in dhammaan beelaha reer Somaliland ay is-cafiyaan, dalkana loo siman yahay, haddaba waxa madashaa iyo dhammaan magaalooyinka kaleba ka dhacayay dabbaal-dagyo, iyo damaashaad badan. Waxaana xusid mudan in abwaanadu ay door muhiim ah ku lahaayeen farxadaasi, iyaga oo ka tirinaayey maansooyin dhaxal-gal ah. Haddaba abwaan Axmed Aw-geedi waxa uu lahaa maanso caan ah oo uu kula dar-daarmaayey hoggaankii dalka loo dhiibay taladiisa ee **SNM**ta. Haddii aan si kooban u sharraxo gabaygan oo ahaa mid soo baxay 1991, lana yidhaahdo "*Godlan*". Waxa uu si toosa u taabanayaa saddex arrimood oo nolosha bulshada Soomaaliyeed ku wajahan, kuwaas oo kala ah: Ugu horrayn hannaankii ay mujtamacii hore ee soomaaliyeed u noolaayeen oo ahayd xoolo dhaqato reer guuraaya, iyo hannaankii ay isku maamuli jireen bal waxa laga faa'iideysan karo ee cilmi ah.

Waxa kale oo uu Gabaygu taabanayaa dhalliilayaana, hannaankii kaligii taliska ahaa ee Siyaad Bare iyo siday dadku ugu hungoobeen maamulkiisii.

Waxa kale oo uu gabaygu ka warramayaa kacdoonadii iyo dadkii naf iyo maalba u huray rididii dawladii Siyaad Bare, ugu dambayna waxa uu abwaanku farriin waano culus xambaarsan u soo jeedinayaa guurtidii iyo maamulkii gacanta ku dhigay mujtamaca isagoo leh "Ha daydaan iska ilaalin khaladaadkii dawladii hore riday idinna waxaydin ku danbayn sidii tii hore (dawladdii Siyaad Barre)". Haddaba haddii aan idin soo gudbiyo gabaygaasi qaaliga ah waxa uu yidhi abwaanku:

Gabay waala tiriyaa cabdaw, kani se waa gaare'
Waa duco gudeysiyo ammaan, geesi soo diraye
Waa gocasho raagtiyo ladh iyo, hibasho ii gaara
Waa geydha roobkiyo ufada, galuhu keenaaye
Waa raxan gadoodiyo libaax, beesha soo galaye
Waa faras gudoodiga bartiyo, gaade iyo weerar
Waa galacda waagiyo, habeen kala gayoonaaya
Waa gabadh xishootiyo barbaar, timaha geedeystey
Waa goray haldhaagoo aroor, gedefka taagaaya
Waa geedka laysukugu tagiyo, golaha waayeelka
Godlan weeye maansadu, ninkay faro lagaadhoowe
Afartaa galool ubax lihiyo, man iyo geed saar dheh
Afar kalana gudiyeey imaqal, waydin garan siine
Goortii aduunyada lasimay, gebi ahaanteedba
Ee guulaheen qaybiyee, gobalba meel joojey
Dhulka uduga laga soo guriyo, xabagta geed saaqa
Soomaali geeskaalafuray, galaya xeebaaye
Geel iyo adhay dhaqan jireen, guunyo faro wayne
Gabdhahaa lakala guursan jiray, gob iyo caadkeede
Gacal iyo xigtey wada ahayd, beel is garab taale
Hadii uu dareen kale galoo, daano kala gaadho
Garta odayadaa qaadi jirey, guud.cadaadige
Gudoonkuna heshiisa buu ahaa, loo gudboon yahaye

Iyadoy gadaa wada tahoo, nabad ku goohaysa
Ayuunbaa waxa soo dhex galay, geed ismjaaris jaane
Waa geedi baabaw waxeer, saatan noogalaye
Guul darayste eel kuu dhigaan, cidina goyneyne
Markii uu sokeeyaha ku gudey, mariyey gaaleefta
Markii uu gadhweyntii jaree, haadku gabasleeyey
Markii uu haween gawdhiyuu, gawrac ugu jiiday
Geesaaska naagaha markii, giida laga waashay
Gees biciid markii uu tuntuu, gudari noo loogay
Daahyada markuu goostayuu, gelen gel noo saaray
Ayuun baanu ciil goohnayoo, goyney dabarkiiye
Gugii hore dareenkii nagalay, gibil madoobaaney
Gugii xigey gunaad baa jiraa, gawnaxyada buuray
Gugii xigey faqhoosiyo gujada, ubadka gaadhsiiney
Gugii xigey dhadhaab guranayoo, laamiyada goyney
Gugii xigey sidii goosan lumay, gees isugu boodney
Gugii xigey Hubkii Gaaranoo, gamaska dhiigeyney
Gugii xigeyan Gaadmiyo Badheedh, nacabkii googoyney
Gugii xigeyna geeda waaqlihii, garabka naafeyney
Gugii xigeyna dooyada galoo, guluf u heenseyney
Gugii xigeyna duhur soo galoo, hadalba soo gaabey

Kun gabraarta kuman leylka guda, kuman kaloo gaafan
Kun gaatamaya kuman ciil la goda, kuman godoodaaya
Kun geylamaya kuman goob dagaal, looga kala guulmey
Kuman marada gaabinahayoo, labada low geeya
Iyo kuman sidii Aarka guda, godabta raacdeeye
Baroon gaaban jiib galaxsan, oo gumaca tuuryeeya
Shilka guuxa suugoo gingiman, guda yaraw biiten
Sii kaawi geelgeel tamoo, cadawga googooya
Foodhiga gariirkii ka baxay, galawgu eedaamay
Garaanbiiga goobtuu ku dhaco, ciidu Gubaneyso
Beebeega orod gaariyeen, cidina Gaadheynin
Kaaraha gurguurtee khalqigu, baqe ka giigaayo
Galabtaan intaa soo tubnee, faqashtii guudkeeney
Sidii goroyo lagu soo baxay, gelelef yaaceena
Gaaleef markii lala dhacee, guduri loo loogey
Maydkoodu waa tuu gignaa, goonyahoo idile
Waligoodba goob layska heley, guul lamay hoyane
Gafuuro xun sidee eebahay, gabo-gabo u taagey
Afartaa golool ubax leh iyo, maniyo geed saar dheh
Afar kalana gudiyeeey imaqal, weydin garansiine
Galadeynu joogniyo ragii, guusha wacan keenay
Nimankii gumaystaha diree, faqashta gaagaabshay
Nimankii sariir lagu gamiyo, guri ka dheeraaday

Nimankii gudoodiga habeen, guura bahaleeyey
Nimankii haween lala golyiyo, gaari wacan dhaafay
Sidii Aar gabood yaleh ragii, gooha damin waayey
Gaashaan dhigeeniyo ragii, gacanta xoogeeyey
Gaajiyo haraadiyo raguu, gawre kari waayey
Ragii gocondhadii aad ogeyd, calaha guud joogey
Guud kooda raamaha ragaad, geydhe baxay moodey
Sidii goray saraareed ragii, goroyo cawloobey
Jananada ragii gawracee, libin ku geeraaray
Gayigooda nimankow xishee, guri kale u dhoofin
Cod mujaahid eebaa galaday, gooruu joogaba'e
Gudiyeey wanaag lama gadee, guda abaal kooda
Calan kaa na guud jooga, iyo guri yagleelkeena
Gobanimada niman baa u go'ay gacalayaalowe
Inta geesi ciida u nafbaxay, waa gun iyo baare
Rabi waxaan galiimaday, inuu geeyo meel wacane
Gudiyeey wanaag lama gadee, galiya taariikhda
Shuhadadu gurboodkii ay dhaleen waa lagaasiraye
Gabanadu haddii ay cawdaan, waa gunimo wayne
Gaari weer ku raagaa ka badan, geedahaa baxaye
Guno iyo xasuus bay rabaan, gu' iyo jiilaal
Gudiyeey abaal lama gadee, guda abaalkooda

Naafadan gacmaha ciirsatee, cadawgu googooyay
Ee wada gurguurtee, kurtood gabi dhaclaynaaya
Ee wada galiilyaysan, ee goroda laalaadshay
Laxaadkooda nimankaa gatee, gumaro noo siiyay
Hadii geesi jiro waa iyaga, garashadaydiiye
Guno iyo dhaqaalay rabaan, garasho waayeele
Gudiyeey wanaag lama gadee, guda abaal kooda
Haweenkii gambada xoorayee, ficil gadoodaayay
Ee giraamka noosoo huree, gacanta noo saaray
Ee aan galaan nagala hadhin, guri wixii yiilay
Iyagoon gasiin hayn, kuwii tamaradood gaystay
Gudiyeey wanaag lama gadee, guda abaalkooda
Dhaawacayga nimankii guree, geeda sare waabay
Eegoolka soo wada dabriyo, gaabanaw adhiga
Gurgurshaaga nimankii qaliyo, gibil madiidaanka
Dooyada ragii ila galee, gaade iga eegay
Reer miyeey garagaaroo, bulshada iiga gooniyaha
Gudiyeey wanaag lama goda, guda abaalkooda
Debadaha ragii geylamee, gooha damin waayey
Ee giniga lacagta ah baxshiyo, guufka iyo moodka
Ee aan goblooleyn marnaba, gamashi waa ceeba
Ninkii ganay iyo waa kala ogyahay, kii galaday Aare
Gudiyeey wanaag lama gadee, guda abaalkooda

Xilkaad guudka saarteen ka culus, buurihii golise
Kuwii horaba waxa loo genbiyey, garabku daqiiye
Idinkuna hadii aad geftaan, waa gedaan jabaye
Umadii godbaa lagu ridoo, guudka laga aasye
Goof bay dhex taalaa bulshadu, gabi ahaan teede
Waxa gododka naartaa ku guray, gacan ku dhiigliiye
Gacalkiyo xigaalkeer is diley, waa gaduu falaye
Intuu reerkan guuluu mid kale, garabka saaraaye
Gaaleysyaduu qeybiyiyo, gudintu soo feeyey
Isku go,ayuun bay ahayd, gacal cun xeeshiiye
Gacmaha isu saaroo bulshada, godobta daaweeye
Yaaney kala gadoomine ka jira, gawdhiskiyo hiifka
Gogol qudha isugu keena oo, samo ku gaalgaala
Geyigeenu wada leenihiyo, gumaro hoostaale
Nina yaan guhaad loola tegin, gocasho waa ceebe
Shir la gooyey, waayeel gabyidhi, garangar muunaysan
Gole xaadhan guurtidoo la wacay talo gorfayn teena
Masuul wuxuu gabtoolaa, markuu eexa guursade’e
Nin qabiil u guuraa ka dheer, guri barawaaqeede
Nin jeclaysi yuu soo dhexgelin, gacalayaal beesha
Qaramaadka danyar laga guree, laysu wada geeyey
Gabaan dhiiqda laga soo lisee, gaban u ooyaayo
Gacan dhaaf ayaan loola tegin, waw gudboonahaye
Wuxuu geel ku dararaa markuu, guri san daaqaaye
Godolkeedii maandeeq la waa, gacal islaamoowe
Gorofkeedii wuu haawadaa Dhawr guyoo tegeye
Ganboor iyo Sunbay daajiyeen, geed xun iyo ciine
Gafanaa ku naaxiyo, kud-kude kaymaha u galaye
Geed sabool ayay yuururtaa, guri habaas weyne
Gu’ga oy hayaan taa u eeg, Geydho wey rimiye
Jiilaalka inay goojisaa, waa  gedaan rabo’e
Goortuu sidkeedii go’, ee gabanta loo qaado
Gujo laguma maaliyo afkee, yare he gaalgaala
Qalax laguma giijee ka jire, dabar danbeed  gooya
Geyigeenu waa hodan hadaan, gees walba udayaye
Dooxyadan ganaaneynayiyo, galalkan ceegaaga
Dudur aan go, ayniyo harada, galacleh ee Jiifta
Mar hadii abuur lagu guroo, gacamo loo jeexo
Gaajaba rugteeniyo ka dheer, guri sabooleede
Majada iyo gadhweyta u qabtoo daaba gudinteena
Uguntada Dadaal buu nafluhu, libin ku gaadhaaye
Diinteena oon garabsanaan, guul ku helaynaaye
Wax kaloo lib lagu gaadhayaa, waa gefiyo beene
Gudoonsada distoorkiyo sharciga, wow guboonayahay
Malaa hadalka waan guud maree, aan u galo hoose

Umadeeni way goomaan tahay, geliya laabtiina
Gaajiyo haraad baa jiree, galiya laabtiina
Gurboodkeeni way daalanayiin, geliya laabtiina
Gurgurshaagu waa isdinka ee, geliya laabtiina
Afar geedi baa lagu hodmaa, geliya laabtiina
Galxareeda baa muuqda ee, geliya laabtiina
Geyi doog lebaa soo hiree, geliya laabtiina
Goobaare dacalbaa hadhee, geliya laabtiina
Golibaa idaha laysa ee, geliya laabtiina
Gorgorbaa maroodiga cunee, geliya laabtiina
Garwaan luhu marbuu ii dusee, geliya laabtiina
In aan gaadh dib laysaariheyn, geliya laabtiina .

Muddo aan sannadba gaadhin haddii ay ka soo wareegtay dhismihii maamulkii dawladii Somaliland ee lagu soo dhisay Burco ee SNMtu hormoodka ka ahayd. Ayaa waxa abwaanka u muuqatay in aan waanadiisii dheg loo jalaq siin. Waxa shaki ka galay in maamulkaa wakhtigaa jiray uu daacad ka ahayn hawshii loo igmaday.

Sababtoo ah haykal dawladeed lama dhisin, kala dambeyntii dawladnimo lahayd ma jirto, wasaaradihii iyo hawl-wadeenadii dawladdu ma shaqeeyaan, ifafaale fiicani ma muuqdo, day-day iyo dhul jiifkii ayaa batay, qaxoontigii dalka ku soo guryo noqday wax loo qabtay ma jirto, hoggaankii sare ee dawladdu iyaga ayaa isku mashquulsan, naafo iyo agoon hadalkooda daa. Waxa waliba xusid mudan in wakhtigaa dalka ay soo gaadheen mucaawimooyin badan oo iskugu jiray shidaal iyo raashin ka yimid dawladdaha carabta oo ka soo dagay dekedda magaalada Berbera. Haddaba Abwaan Axmed Aw-geedi, isaga oo arintaasi si aad ah uga xun ayaa waxa uu tiriyay maansadan caanka ah ee la yidhaahdo " *Shicib dawlad waayay*". Haddii aan idin xasuusiyo erayada ama tuducyada ay ka kooban tahay maansadaasi waxa ka mid ahaa sidan:

"Innamadii la doortoow,
Ciidamadan duleeddada,
Goosan waliba meel degey,
Badhba diir u galiseen,
Maa laysu soo dumo,
Misa talaw dantiinaa,
Ku bukoota daawada,
"Innamadii la doortoow,
Duf ku baxaha tuugah
Ninka jaray dariiqyada,
Dadka waa beryaba dhaca,
Xabsi loo diyaarshiyo,
Dawlad baa ciqaabtee,
Maxaa daanadduu qabo,
Qabiil loo dul dhigayaa,
Ilma day-day reer ma leh,
"Dar Allee siyaasoow,
Dabka aad shidaysiyo,

Duurka aad gubaysaa,
Waa dagaal sokeeyee,
Maad dhimi durbaanada,
Shicib dawlad waayow,
Xaajada markaan deyey,
Dus-dus iyo khiyaamiyo,
Il damuuqsi baa jira,
Shicib dawlad waayoow,
Dibnaa kuu halaanhali,
Uurna waa la dabayaa,
Shicib dawlad waayoow,
Hebel waa nin door iyo,
Hebel daacad weeyaan,
Hebel baase daalina,
Waa lagugu dagayaa,
Isma darajo dhaamaan,
Abeesiyo dirkeediyo,
Nin waliba dantiisuu,
Darka ceel u laasimay,
Dawliskana u haystaa,
Shicib dawlad waayoow,
Doonidaad ku joogtaa,
Duufaan bay u halistahay,
Shicib dawlad waayoow,
Daarta aad dhisaysaa,
Dhanka kalay ka dumaysaa,
Shicib dawlad waayoow,
Ruqahaad dar leedahay,
Dabaday hayaan qaar,
Shicib dawlad waayoow,
Rimaddii la daajee,
Hadba rabadiin doogliyo,
Doh bannaan la geeyee,
U sid tiriyey doob jiray,
Markay fool la dihataye,
U darruuray gaawaha,
Gabno kuma daryeeshee,
Mar haddey hudeeliyo,
Deeqi weydo maatida,
Ama diido nirigtaba,
Dib inuu xaraashiyo,
Inuu daabaxaa u furan,
Shicib dawlad waayow,
Gabadhii la doonaye,
Aqal laba daryaaliyo,

Dadab lagu aroosee,
Laga dhiibay duunyada,
Mar hadday danteediyo,
Alab dumar lahaa iyo,
Garan weyday dawgii,
Waa damal hadhwaayaye,
Dawliil dheer ninkii qabay,
Dalaaq iyo walaw furan,
Shicib dawlad waayoow,
Wiilkii la dararshee,
Waayo loo dadaallee,
Laga dhawrey daranyada,
Markuu doob laxaadsadey,
Hadduu waalidkii dilo,
Ama daacaddii jaro,
Abaal dooris weeyee,
Ma dugsiyo ninkii dhallay,
Inuu deyriyaa u furan

Mudooyinkii ay **SNM**tu dalka xukumeysay waxa ka dhacay dhammaan gobolada dalka Somaliland, dagaalo sokeeye, waxa uu ahaa abwaan Axmed Aw-geedi abwaannadii fara ku tiriska ahaa ee ka gabyi jiray khayriyada maagalada Hargaysa, isaga oo in badan uga digi jiray dadka in dagaal aanu faa'iido lahayn, nabaduna tahay ta dadka deeqda, ee la iska dhaafo dagaalka iyo cunsuriyada kale ee qabiilka ah. Waxa uu colaaddahaa ka tiriyay suugaan door ah oo runtii qofkii akhriyaa ama dhagaystaa uu ku waano qaadan karo, haddii aan mid ka mid ah suugaantaasi oo uu ka tiriyay kheyriyada Hargaysa wakhtigii ay socdeen dagaaladdii sokeeya aan tuducyo ka mid ah idin soo qaado, waxa aad garan kartaa halka uu colaadaasi ka taagnaa abwaanku, in ay tahay mid runtii guurtinimo ah, oo odaynimo leh dhaqankeedii. Maansada "*Dagaal wiil kuma dhasho*", waxa ay ka mid tahay maansooyinkaasi aan hore u soo sheegay, haddii aan soo qaato tuducyadeeda waxa ka mid ah:

Nabad baa lagu dhaqdaa
Nabad baa lagu dhistaa
Nabad baa lagu dhergaa
Maxay dhiiladu tartaa
Dagaal wiil kuma dhashee
Ogow wiil baa kudhiman
Dhibaatada qoys qudhiyo
Dhuluun kuma aadanee
Madhaadoy ruux kastaba
Dhabtiisay saaran tahay
Hadaynaan dhoohanayn
Dharaartii waaberyaba
Maxaa dhiigeena qubay
Warmaha isu dhaafsanaa
Dharaartii waaberyaba

Aheey dhiigbaa qulqula
Aheey waran baa dhul gala
Dhalaan baa lagu tuntaa
Dharaartii waa beryaba
Aheey booli dhaadhi iyo
Gaadaa lagu dhabar jabaa
Colaan waxba dhaafihayn
Dharaartii waa beryaba
Aheey kadin dayr dhallaa
Aheey beel laga dhacaa
Kareeb iyo eeri dhaban
Dharaartii waa beryaba
Gamuunbaa dhiig mataga
Dhulkay xinjiruhu simaan
Dharaartii waa beryaba
Dugaagbaa madi dharqada
Dhurwaa baa hela dubaax
Halyey ku bud-dhigi lahaa
Dharaartii waa beryaba
Dhunkaal baan fuuqsanaa
Dharkayn baan qooshanaa
Ninkii dhacay maal islaam
Kolayba dheef kama helee
Dhinbiil naaruu cunoo
Jaxiimuu dhawrayaa
Ninkii dhiig daadiyaa
Naftiisuunbuu dhiboo
Ifkana nabad kuma dhexmaro
Aakhiro dhuxulbaa utaal
Dadqaadbaa dhiig cabee
Ogow dhuun mudashadiyo
Dhabcaalnimo maaha guul
Halbawlaha dhiig socdiyo
Hilbaha is dhalaynu nee
Warmaha dhiiga le qubaay
Dhaayaha isku ooyayiyo
Dhagihii maqalkaanu nee
Waxyeelada dhaafa hooy
Walaalo is dhawrta iyo
Dhammaan gacalbaynu nee
Belada lama dhiiriyee
Samaa loo gogol dhigaa
Anaa laandheere iyo
Miyaynaan dhaafi hayn
Tollaay iyo dhalasho jaan

Dhaxdimo sheegiyo danbaas

U kuur galida dhaqanka, iyo hiddaheenu waa astaan uu gaar u leeyahay abwaanku. Waxa uu sameeyaa daraasado badan oo cilmi baadhis ah, kuna saabsan dhaqankeena suuban. Hadda wakhtigan xaadirka ah ma sahlana sidii ruwaayad dhan loogu matali lahaa goob fagaare ah, waayo wax badan ayaa is badalay, dhaqankii, iyo sidii loo xiisayn jirey ruwaayaddahii majaajilada iyo heesuhu isku dhafnaayeen ee aynu caanka ku ahayn, waxa hadda laga door biddaa heeso la isku xidhiidhiyo oo uu fannaanku maanta oo dhan ku hor-taagnaado, oo lagu ciyaaro. Haddaba abwaan Axmed Aw-geedi, waxa uu heestan "*Xujo*", uu innoogu soo gudbinayaa waxii lagu matali lahaa ruwaayad dhan, dhanka kale waxa uu si qoto dheer innoogu sharraxayaa oo uu inoogu soo koobayaa heestan waxii ruwaayad dhan lagu matali lahaa, heestu waxa ay si mug leh u taabanayaa dhaqankeennii fiicnaa, hiddaheennii suubanaa, waxa ay is bar-bar dhigaysaa ragga iyo dumarka ka xumeeyey ee dhaqankii badalay ka uu yahay, haddii aan si kale u dhigo, waa dood dhex maraysa Xirsi oo ah wiil dhaqan yaqaan ah iyo Xasna oo gabadh iyaduna dhaqanka aad u taqaanna, waxa ay labadooduba isku eedaynayaan in ragga iyo dumarku uu midba gaar uga masuul yahay dhaqan doorsoonka, waxaaney kala difaacayaan labka iyo dheddigga. Gunta iyo gaba-gabadda heesta waxa soo kala dhex galayaa guurti una kala sheegi doonta halka sartu ka qudhuntay, ee dhaqankii suubanaa, ee aynu lahayn u ka door soomay

**Xasna** dhaqankii xar baa galay waa xujooy
Xiisihiisi duugoow waa xujooy
**Xirsi** hadduu waa xideysnaa waa xujooy
Xoon bay dhashii taal waa xujooy
**Xasna** duul xumaan u baratama waa xujooy
Xaasha'e ma fiicnee waa xujooy
**Xirsi** dad hadduu xishood gabo waa xujooy
Xoolaha ma dhaammee waa xujooy
**Xasna** xagee baan ku soconaa waa xujooy
Oo xadhiga loo jaray waa xujooy
**Xirsi** xaawaley dhankiinaa waa xujooy
Xamashadu u badan tahay waa xujooy
**Xasna** haddaan xaal-mastuur jirin waa xujooy
Raggaa gabay xilkiisii waa xujooy
**Xirsi** xishoodkii xaguu maray waa xujooy
Ugub loogu xilan jiray waa xujooy
**Xasna** haddaan lays xag-xaganeyn waa xujooy
Raggaa gooyey xadhigii waa xujooy
**Xirsi** umul xiiska aan jirin waa xujooy
Hablow xiinka soo dhimma waa xujooy
**Xasna** hooyadey xigteeniyo waa xujooy
Rixim goys rag weeyaan waa xujooy
**Xirsi** xayaysiiska gaalada waa xujooy
Xiskiinii hablow xaday waa xujooy
**Xasna** xaskul iyo raggow ciin waa xujooy
Xas maraaya baa tiin waa xujooy

**Xirsi** xiidkaan dhakoolline waa xujooy
Xidin xiito waa dumar waa xujooy
**Xasna** dhurwaagaan xaboobane waa xujooy
Raggu waa xinjire liqe waa xujooy
**Xirsi** xeel iyo khiyaamiyo waa xujooy
Xaglis baa hubkiin yahay waa xujooy
**Xasna** xoog iyo awoodiyo waa xujooy
Xiniinyaa ku faantaan waa xujooy
**Xirsi** Aadan baa ka xoorteen waa xujooy
Janaduu xabiib dhigay waa xujooy
**Xasna** xaawelay dhibteediyo waa xujooy
Xistigaa ku naaxdaan waa xujooy
**Xirsi** xansadoo xogtiinii waa xujooy
Xadhig ma soo hataatiin waa xujooy
**Xasna** xaqiiqdii raggoo idil waa xujooy
Xayeesh buu u badan yahay waa xujooy
**Xirsi** xabag geed ku taaliyo waa xujooy
Dharabaad u xilateen waa xujooy
**Xasna** gabadh nimaan xareyn karin waa xujooy
Maxaa loogu xeebtaa waa xujooy
**Xirsi** xeerkiyo dadnimadii waa xujooy
Xoolahaa ka jeceshiin waa xujooy
**Xasna** nimaan xiito geel dhaqan waa xujooy
Maxaan ugu xishaa sheeg? waa xujooy
**Xirsi** geyaankii la xulan jiray waa xujooy
Xabashaa ka raacdeen waa xujooy
**Xasna** xay ka cad ninkii gamay waa xujooy
Saciisii xalaalow waa xujooy
**Xirsi** markaan dumar xasuustaba waa xujooy
Cadhaan xanaf warreeraa waa xujooy
**Xasna** lib gad iyo xumaantiyo waa xujooy
Xistigaa u dhalateen waa xujooy
**Xirsi** xay dhoolka eedaw waa xujooy
Doobkii xareyn jiray waa xujooy
**Xasna** xiin waal hadduu didey waa xujooy
Xereduu u galay bahal waa xujooy

**Xaye** xeer beegti hadashaa waa xujooy
Garta xubin u yeeshaye waa xujooy
Xaqiiqdii waxaan nahay waa xujooy
Dhabarkiyo xanjaadkiyo waa xujooy
Seedaha xidhiidh shoo waa xujooy
Xubin baynu nahay qudha waa xujooy
Xaashaa! Lilaahiye, waa xujooy

Mana geyno xumaan iyo waa xujooy
Xajiin leys marmariyee waa xujooy
Inagoon xafiil tamin waa xujooy
Ama qodin xabaalaha waa xujooy
Xaqa maw adeegnaa waa xujooy
Dumarow xumaan dhiga waa xujooy
Raggow daa xasaraddii waa xujooy
Dumarow xadkaa garo waa xujooy
Raggow gudo xilkaagii waa xujooy
Dumarow xistiga naca waa xujooy
Is xamuur raggow daa waa xujooy
Dumarow xurmada sida waa xujooy
Xildhibaan raggow noqo waa xujooy
dumarow xishood badi waa xujooy
raggow xeeri dhaqankii waa xujooy

Abwaan Axmed Aw-geedi, waxa uu inta karaankii ah ku tun-tuunsaday sidii uu dhaqankii hore ee miyiga ee lumay usoo noolayn lahaa. Tusaale ahaan, heesihii waagii hore la qaadi jirey markii la joogey miyiga, ayaa aad arkaysaa wakhtigan casriga ah iyada oo heeso magaalo laga dhigay, taasi waxa ay tilmaan fiican u tahay in qofka magaalada joogaa uu ogaado qaybo badan oo ka mid ahaa dhaqankii reer guuraanimada. Waxa kale oo uu abwaanku si qoto dheer iyadana uu u soo gudbiyaa suugaantaasi oo runtii ku fadhida sarbeeb, hal-qabsi, hal-hays, odhaah, I.W.M.
Dhaqankeennii hore waxa uu lahaa heeso badan oo la odhan jiray hees hawleedyo, hees ciyaareeddyo, waxa heesahaasi ka mid ahaa kuwa geela. lo'da, adhiga, riyaha, dameeraha, fardaha, agabka guryaha laga sameeyo, waraabinta xoolaha, dhaanka I.W.M.
Haddaba abwaan Axmed Aw-geedi isaga waxa uga horreeyey abwaanno badan oo runtii iyaguna dadaal badan u galay sidii aan loo lumin hees hawleedyadaasi ku dhisan dhaqankeennii qaaliga ahaa, abwaannadaasi oo dhammi waxa ay ka siman yahiin sidii ay u keeni lahaayeen dhaqanka hees-hawleedyadaasi, ama hees ciyaareedkaasi magaalooyinka.
Waxa aynu eegi, tusaale ahaan bal abwaan kastaaba waxii uu ka yidhi ee hees magaalo soo gashay ah ee ku taxaluuqa hees hawleedyadaasi ama hees ciyaareedkaasi..
Ugu horreyn aynu soo qaadanno hees uu curiyay abwaan Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi".Heestani waxa ay ka mid tahay furaha ciyaaraha Sayliciga , oo ka mid ah ciyaar dhaqameedka ugu caansan dalkeena, erayada heestaa ku jira ama saldhiga u ah waa sidan:

*"Muliyooy ha saasey,*
*Hay saaseey,*
*Muliyaa Saaseey,*
*Hay saaseey,*
*Muliyaa saasaa,*
*Hay saasaa,*
*Muliya saasaa,*
*Hay saasaa.*

Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" isaguna sida Hadraawi si la mid isaga oo soo qaadanaaya hees-hawleedyadaasi waxa uu yidhi:
1: *Alla dheeriyaa*
*duxusha ka madoobiyaa*

*2: Maroodi cadhoolle,*
*Haddii col la sheego*
*Caddaada ku meere*
*Hashii cosob waa tan*

Sidoo kale ayaa abwaan Xasan X. Cabdillahi "Ganey" uu isaguna sida Gaarriye si la mid ah aynu ka soo qaadan karnaa heesihiisa,mid ka mid ah, taasi oo soo nooleynaysa heesihii loogu heesi jirey xoolaha ee ahayd hees hawleedyada, waxaanu yidhi Ganey:
"*Meel idaha seel u leh,*
*Riyahana salool u leh,*
*Oo geela saar u leh.*

Abwaan Saciid Saalax Axmed ayaa isaguna alifey hees qaali ah, dadka badankiisuna dhagahiisu ay maqlaan maalin walba, Waxaanu yidhi abwaanku:
"*Alif la kor dhebay,*
*Alif la hoos dhebey,*
*Alif laa goddey.*

Sidoo kale ayaa Maxamed Cali Kaarriye, uu si la yaab leh u soo nooleynayaa hees ciyaarreedyadii laga ciyaari jirey miyiga, waxaanu yidhi abwaanku:
"*Galan gooley,*
*Gef bay baratee,*
*Sidirri gam.*
Sidoo kale ayaa abwaan Maxamuud Tukaale uu isaguna soo xigtey odhaahyo hore,waxaanu yidhi:
"*Fadhiyare geel,*
*Fukucle ragiyo,*
*Fududo haween,*
*Midna faa'iido ma leh*
*Baa la yidhi.*

Si la mid ah ayaa abwaan Yuusuf Adan Xuseen uu isaguna, u soo xiganayaa maah-maahyadii hore, waxaanu yidhi:
"*Ileyn doqoni qiiq kama kacdee*
*Daaman kay meer meerisaa*
*Doqoneey dabkaa be*
Abwaan Xasan Cilmi oo reer Jabuuti ahaa, waxa uu leeyahay oo uu dhex-taal u qaatey heesihii hore gobol ka mid ah, waxaanu yidhi:
"*Wacays baan soo sidaa,*
*Waa wiil,*
*Badheedhaan daba wadaa*
*Waa gabadh*

Haddaba sida ka muuqata abwaannadaasi, waxa ay dhammaan ka siman yahiin in ay adeegsadeen hees odhaahyo hore, si ay u nooleeyaan, uguna beeraan maskaxda dhallinta reer magaalka ah in ay heesahaasi yahiin, kuwii dhaqankeennii hore ahaan jiray hees ciyaareedka..

Dhanka kale haddii aad eegto waxa aad ka heli kartaa heeso badan oo ku fadhiya sarbeeb oo ahaa hees odhaahyaddaas hore, ka dib markii la magaaleeyay. Abwaan Axmed Aw-geedi, waxa uu la mid yahay abwaannadaasi aan soo sheegnay, waxaanu la wadaagaa soo nooleynta hees-hawleedyadaasi dhaqankeennii hore ahaan jiray. Waxase aad ugu tagaysaa kuwa Axmed Aw-geedi sarbeebo badan oo dhex fadhiya, marka aad bayd walba akhrinayso heesahaasi. Tusaale ahaan heesta “*Garo*”, waa heesaha uu abwaan Axmed Aw-geedi sida laxaadka leh ugu tun-tuunsaday sidii uu sarbeebo badan maanka iyo maskaxda ugu carin lahaa. Tusaale ahaan waxa uu dadka u sheegayaa in Riyo la-la hadlaayo, runtuse taasi way ka fog tahay. Dhammaan heesahan waxa qaada fannaaniinta caanka ah ee reer Somaliland, ka dib markii uu dhammaan heesahan uu codeeyay, mulaximka weyn ee  Cabdikariin Faarax Qaarey “Jiir”. Dhammaan heesahani waa kuwa ka gudbay baddaha oo gaadhay dhulweynaha lagaga hadlo afsoomaaliga. Inta aanan sharraxaad dheeraad ah ka bixin horta ila eega bal heesta Garo, haddii aan tuducyadeeda idin soo gudbiyo waxa ka mid ah sidan:

“Talo gumaro ah,
Aan godlee qabo,
Aan gaheydhiyo,
Geydhaheeniyo,
Manka guranee,
Hayna digo gubin,
Gob colawdaa,
Way gumawdaa,
Yaaney giir-riyo,
Gees biciidliyo,
Goolka naaxiyo,
Qaanka goosmine,
Geydha dirirtiyo,
Gufaacada hore,
Ugeybkaa go’a,
Yeynaan gaabane,
Galeydh yeyntiyo,
Guubaabada dhima,
Garay garo daa,
Oo garaan daa,
Oo garbo cas daa,
Adna giirooy,
Ka gu’ weynide,
Guuxa hoosiyo,
Gardarada daa,
Haddii gocoriyo,
Ina garashuun,
Dareen kala galo,
U gar qaadoo,
Gadh cadaa iyo,
Guurtida u madha,
Gurta bidixeey,
Gacantaa midig,

Waad gudboon tihiin,
Ha garaaxine,
Is gar-gaarsada,
Oo is garabsada

Sida ka muuqata midhaha heestan caanka ah ee “*Garo*”, waxa aad dareemi kartaa in sarbeeb badani ka buuxdo, waxase hubaal ah in sida xaqiiqdu tahay aan looga dhaweyn abwaanka curiyay ee abwaan Axmed Aw-geedi. Sida ka muuqata heesta waxa aad arkayaa dagaal, dareen, heshiis, nabad, colaad, iyo in dhammaan waxaasi oo dhan lagaga gudbi karo Guurti xilkeedu noqdo, garasho iyo caddaalad aan lahayn eexasho, waxaanad garan kartaa in abwaanku riyaha uun uu inagu hal-qabsaday ee ay dulucda sheekadu ka dheer tahay intaasi. Waxa aad fahmi kartaa heestan nuxurkeeda marka aad dhawr jeer ku noq-noqoto ee aad u daadagto halka sirta heestani ku jirto oo ah tuducyada u dambeeya.
Kuma koobna kow iyo laba heesihiisa sidan oo kale u ah sarbeebta, waxaynu tusaale kale u soo qaadan karnaa heesta kale ee la yidhaahdo “ *Sumaloow darbane*”, heestaasi kale iyadana intaanan sharraxaadeeda u galin aan idin soo gudbiyo tuducyo ka mid ah waxaanu abwaanku yidhi sidan:
“Dadku waa hayaan,
Roobaa kada`ay,
Daba taxantiyoo,
Sahan doodiyiyo,
Horseed baa la direy,
Cir daroorey iyo,
Daruuraha onkodey,
Doog dhabashadii,
In la duulo saw,
Damac muu ahaan,
Dalan doolayoo,
Waan daaley iyo,
Halanoo degiyo,
Awraha dabaal,
Doorkan waa la nacay,
Waxa jira dugaag,
Weer daaliniyo,
Aar iyo dadqaad,
Derimaha ka badan,
Dib u feejignow,
Xil daruuran baa,
Dumadaada sudhan,
Nayl daba yar iyo,
Deylooy laxdii,
Yey kaa dib jirin,
Sumalow darbane,
Naylaha duduuc,
Oo dooxo gee,
Oo damal hadh geli,

Oo dacawadii,
Dabada hunbul layd,
Yey kaa daldalan,
Yey kula dul Marin,

Maxaad dareemi kartaa marka aad tuducyo ka mid ah heestan aad dhugato? Runtii sarbeebta ku jirtaa waa mid ku fadhida xikmad iyo qiime weyn, oo aan lagu soo koobi karin qoraalkan yar ee aan si dul ka xaadis ah idinku soo gudbiyay, waxase hubaal ah in aad fahmi kartaan in wax weyne meesha ku jiro. Hore ayay soomaalidu u tidhi “*Hadal waa margi oo hadba waa dhankii loo qaado*”. Dad badan ayaa heestan siyaabo kala duwan u fasiray. Qaar baa ku sheegay in ay siyaasad dabada ku hayso, qaar kalaa yidhi waa arin dhaqan, qaar kalaa yidhi waa sarbeeb mug weyn, qaar kalaa reero u xambaariyey.
Heestani, runtii waa sarbeeb qoto dheer oo aan la soo koobi karin sharraxaadeeda, waxase laga dheehan karaa haddii aan loo daymo la’aan in si fiican loo fahmo. Dhanka kale heestani waxa ay ka mid tahay heesaha laga mamnuucay in laga sii daayo Radiyo Hargeysa, ka dib markii dad badani ay u fasireen in xukuumadda looga jeedo. Si kastaba ha ahaatee heesta Sumalow darbane, waa heesaha ugu caansan ee uu abwaanku leeyahay, lagana dheehan karo qiimaha farshaxannimo ee uu u yeelay wax badan.

Hiddaha iyo dhaqanku, waa astaan ay ku faanaan ummaduhu, waxaanad ku arkaysaa in dhammaan gabayaaga, soomaaliyeed ay ka siman yahiin in ay aad u tixgeliyaan dhaqanka iyo astaamaha gaarka ay soomaalidu u leedahay, waana hubaal in ummad waliba ay ku faanto dadka intiisa muhindisnimada leh, sida macalimiintiisa, dhaqanyaqaankiisa, abwaanadiisa, dhakhaatiirtiisa, aqoonyahannadiisa,.
Haddaba abwaanadu waxa ay inta badan xooga saaraan sidii inta fiican ee dhaqanka ay inoo tusi lahaayeen. Abwaan Axmed Aw-geedi, waxa uu si layaab leh ugu talax-tagay dhaqanka, waxaanad ka dhex arki dhammaan maansooyinkiisa in dhaqanku si gaara ugu weyn yahay abwaanka, kaba sii daran ee, waxa uu abwaanku si toos ah u soo qaataa tusaalooyin laga fahmi karo miyi iyo magaalaba.
Heestanna waxa aad ku dhex arki doontaa suugaan qiime leh, oo ku arooraya dhaqankeennii aynu gaarka u lahayn, waxaanu astaan gaara ka bixinayaa abwaanku hiddaha iyo dhaqanka aynu gaarka u leenahay ee cid inala wadaagtaa aanay jirin, “*Waa sadkeeniyo, Sawraceenoo, Sinjaan ulahayn* . Waa ubucda heesta. Ku dheeraan maayo sida uu abwaanku dhaqanka iyo hiddaha u ammaanay, wax badana uu ka qoray, waxa igaga filan oo kali ah adiga oo ila eega heesta la yidhaahdo “ *Baadi-sooc*”
Haddii aan tuducyo ka mid ah heestaasi aan idin soo gudbiyo waxa ka mid ahaa erayadeeda sidan:
‘Seehi geeloo,
Sadex boqol iyo,
Sagaashan habeen,
Uu sid keed yahay
Waa sedkeeniyo,
Sawraceenoo,
Sinjaan ulahayn

Baarqab suguloo,
Maraq saarkiyo,
Ilaa sararaha,
Dhibidii simay
 Sange shaal iyo,
Sitaac quruxliyo,
Laji sudhantoo,
Sindiyaal lulay
 Darmaan sebiyoo,
Gaasabixinoo,
Siddii wiil curad,
Sixin lagu habo
Waa sadkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Sac irmaanoo,
Weyl aan socod baran,
U siyaaxiyo,
Gadhoodh iyo subag
 Dibi suudh loo,
Sarar waynoo,
Seero daaqoo,
Geesku samay yahay
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Orgi salawloo,
Suurad bahalloo,
Seenyo dhuuxeey,
Sinsaaro udhigay
 Sumal gooloo,
Tiro suuriyo,
Sabeenaha ugub,
Jeeni wada sudhay
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn

Suuban boqor iyo,
Saddex qayd iyo,
Bafto sidatoo,
Subeeciyad xidhan
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn

Barbaar seefiyo,
Hooto samayliyo,
Saddex geesiyo,
Sita dhuugii
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Boqol sooniyo
Guurti sooftoo,
Sama talisoo
Geedka lagu sugo
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Seerma waydiyo
Dadkoo saxal baxay,
Dhallin saxanoo
Sacab tumataa
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Surad iyo lool,
Gaari soohdoo,
Gabadh lala sugo,
Dhibaad iyo sii
Waa sedkeeniyo
Sawraceeniyo
Sinjaan ulahayn
Marti socotoo,
Sama faliddeed,
Sumal gooliyo,
Sogob loo qalo
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Sooryo xididoo,
Xeedhyo saabliyo,
Caanihii sulub
Habeen lagu sedo
Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Baadi sooc iyo
Dhaqan suganoo,
Soo jireenoo
Aan sal guurayn

Waa sedkeeniyo
Sawraceenoo
Sinjaan ulahayn
Rabaw saawiyo,
Saxal cudur iyo,
Aafo socotiyo,
Sadho naga hay
Rabaw sigashiyo
Col saqaafiyo
Weerar siman iyo
Sumuc naga furo
Rabaw siigiyo,
Abaar suruqdiyo,
Soof idlaadiyo,
Saban naga dhawr
Rabaw silic iyo
Saac fogaadiyo
Saba guurtiyo
Saymo naga kori.

Kuma koobna intaasi heesaha dhaqanka ku tiirsan, ee uu abwaanku in badan cilmi baadhis ku sameeyay. Waxa uu abwaanku qoraal ahaan ku hayaa dhawr cilmi-baadhis oo uu ka sameeyay dhaqankeena iyo sida ay suugaanta iskugu xidhan yahiin, iyo waliba dhaqankeena iyo taariikhdiisii uu soo maray. Axmed Aw-geedi heesihiisa iyo suugaantiisuba, waxa ay soo jiiteen dad badan oo qoraalka caan ku ah. Suugaanta abwaanka waxa loo turjumey afaf kal duwan, sida ingiriisi, faransiis. Heestan "*Bari soomaal* "waxa ay ka mid tahay heesahaasi afka qalaad lagu turjumey ee aan qoraalkooda arkay. Waxa heestan turjumtay gabadh aqoonyahannada ah oo la yidhaahdo **Rooda A**. **Raage**. Siddoo kale ayaa **Xuseen Cabdi Guuleed** oo qoraa reer Jabuuti ah uu af-faransiis uu u rogey laba maanso oo kala ah "*Dagaal wiil kuma dhasho*", iyo "*Dumar waa ma dhaafaan*"

Haddaba, heesaha noocaasi oo kale ah, lama soo koobi karo, waxase aan haddana idin soo gudbin, hees kale oo ka mid ah kuwaas dhaqanka aadka uga hadlaaya oo la yidhaahdo "*Bari-soomaal*". Waxa ay ka mid tahay heesaha ku soo jiidanaaya midhaheedu. Waxaanay ku jirtaa heestani, heesaha afka qalaad loo turjumey ee uu abwaanku leeyahay, waxaanan idin soo wada gudbin doonaa heesta, iyo turjumaaddii ay Roodi ku sameysay oo wada jira. Haddii aan tuducyo ka mid ah idin soo gudbiyo waxa ka mid ahaa erayadeedii:

| | |
|---|---|
| Barri soomaal | The Somaliland |
| Sidaan subaxiyo | I left one morning |
| Salaad uga gudey | At down I headed afar |
| Een u suudaley | On a long departure |
| Sideed guuraba | For eight long year's |
| Ilma saarinee | I have not seen my land |

| | |
|---|---|
| Sokeeyahayoow | Oh! Dear relative |
| War i siiyoo | Give me news |
| Raggu sahankii | Does men's quest |
| Ma sidii baa? | Remain the same? |
| Geelu sidigtii | Do she camels still feed |
| Ma sidii baa? | Orphaned ones the same way? |
| Adhi sarartii | Fat sides of sheep |
| Ma sidibaa? | Are they still the same? |
| Lo'du subagii | Pure ghee from cattle |
| Ma sidii baa? | Are they still the same? |
| Suuqii yurubaan | In European markets |
| Ku salcaamoo | Despondent I became |
| Sidii siigiyo | Like a siig |
| Sinnga siingaha | And his kind |
| Summad laawiyo | Strange and mediocre |
| Sirqaan quranee | Is how I'm acknowledged |
| Sokeeyahayoow | Oh! Dear relative |
| War i siiyoo | Give me news |
| Sokeeyiyo xidid | Relationship between kin and |
| Ma sidii baa? | In-laws, are they still the same? |
| Isa sudhan gacal | Attached relatives |
| Ma sidii baa? | Are they still the same? |
| Siira wada taal | Communal neighborhood |
| Ma sidii baa? | Are they still the same? |
| Salaan gobannimo | Noble exchange of greetings |
| Ma sidii baa? | Are they still the same? |
| Sareedo adduun | In life's abundance if, |
| Haddaan sarar iyo, | I was once fed with fat |
| Sixin dhami jirey | Meat, nourished with pure ghee |
| Sinji dhaanna | Bigots have now |
| Isa-dheeyoo | Poisoned me, and |
| Duuf isiiyaye | Fed me with mucous |
| Sokeeyahayoow | Oh! Dear relative |
| War i siiyoo | Give me news |
| Sodoh alabkeed | Deference to mother-in-law |
| Ma sidii baa? | Is it still the same? |
| Aqal sogortii | Hides fortifying our houses |
| Ma sidii baa? | Are they still the same? |
| Sitiyo alool | Hand made bowls and sleeping |
| Ma sidii baa? | Mats, are they still the same? |
| Odkac lagu sugey | Dried meat preserved in those |
| Ma sidii baa? | Bowls, are they still the same? |

Waxa kale oo xusid mudan in abwaanku leeyahay riwaayado badan oo aan ifka arkin, dhammaan riwaayadahaasi waxa ay ka siman yahiin taageeridda dhaqanka iyo hiddaheena, riwaayadahaasi waxa ka mid ahaa aan ifka arkin, riwaayadda la yidhaahdo "*Ruuuxba ruux jamay*

*oo ka kale jiidh*", waxa uu abwaanku riwaayaddan sameeyay 1986kii, waxaney ahayd riwaayad siyaasi ah. Waxa taasi u xigtey oo uu sameeyey sannadkii 1987kii, riwaayadda kale oo la odhan jiray "*Daran-dooriyaaba naas-naasi* ", riwaayaddani iyaduna waxa ay ahayd mid siyaasi ah oo lagu duraayo nidaamkii kali taliska ahaa ee wakhtigaa jiray. Riwaayadaha kale ee aan ifka arkin ee abwaanka waxa ka mid ah "*Allaaleey*", "*Xujo*"labadan riwaayadood waxa ay si toos ah u taabanayaa dhaqanka iyo hiddaha., waxa kale oo ka mid ah riwaayaddaha abwaanka "*Barisoomaal*", oo si cad u taabanaysa dhibaatooyinka qurbaha iyo saameynta uu ku yeeshay bulshadeena.

Dhanka kale abwaanku waxa uu in muddo ah ka shaqeynaayey Haayadda "***Havoyoco***", waxa uu haayaddaasi u sameyn jirey suugaan door ah. Waxase xusid mudan in qaybta wacyigelinta ee haayaddaasi" *Circus Somaliland*", uu u sameeyey riwaayaddo door ah, oo aan halkan lagu soo koobi karin. Dhammaan riwaayaddahaasi waxa ay ahaayeen kuwo wacyi galin ah oo ka hadlaayey, Waxbarshada, deegaanka, xuquuqul iinsaanka, nabadda, dhibaatooyinka cudurrada sida: HIV-ga, malaariyada, dabaysha, , I.W.M.Dhammaan riwaayaddahaasi waxa laga dhigey caasimadda iyo gobolada ay ka kooban tahay Jamhuuriyada Somaliland

Dhanka kale 1993-kii ayaa dawladda Maraykanku waxa ay ciidamo la odhan jiray **UNISOM** ay u dirtay magaalada Muqdisho, oo wakhtigaa qax iyo qalalaanse ba'ani uu ka jiray. Sida iska dhacda mar-mar badan waxa uu Maraykanku isku haystaa in uu isagu masuul cad ka yahay dhammaan waxii daafaha dunida ka dhaca. Abwaan Axmed Aw-geedi isaga oo ka xun dhibaatooyinka uu Maraykanku u gaysanaayo dawladdaha Islaamka ayaa waxa uu ka tiriyay Maanso caan ah oo la yidhaahdo "*Mareeg diid*" oo soo baxday 1993-kii horraantiisii. Erayada maansada ku jira marka aad dhuuxdo waxa aad ogaanaysaa sida qiimaha leh ee uu abwaanku ugu talax tagay in u ina tuso ceebaha Maraykan, iyo dhibaatooyinka uu dunida ku hayo, waxa uu sawir guud inaga siinayaa in meeshii dan ugu jirto uu tago, waayo xasuuqii loo gaystay dadkeena kama hadli jirin, maqaaxida u shidan ee **UN**-tuna waa mid uu isagu ku hor kaajo waxii uu doonana uu ka sameeyo.
Ducada abwaanka iyo dhiirigalintiisu waa mid aynu insha'allah rajaynayno in ay mar uun dhacdo. Waxa ka mid ah haddii aan tuducyo ka mid ah, idin ka soo qaado kaydka qoraalkayga sidan:

"Rag allaw mamaqasheen
Wuxu yidhi maraykaan
Muqdishiyo hargaysaan
Ku maydhaamayaa xoog
Anaa dunida maamulla
Hadhacaan maraykaan
Iyo kuwa kumaranee
Isku mad-habyihiin iyo
Mugdiyow gumays taha
Ku qadhaabta maaraha

Qaramada midoobiyo
Majliskay kufaanaan

Waa maqaaxi reer yurub
Iska maamushaannoo
Maqal iyo shaqaala leh
Waxa qaba maraykaan
Butruskaad maq-maqasheen
Waa yuhuud midawdiyo
Mulxid gaalo wadatoo
Muslinkay kudagayaan
Iyo carabtan moodka ah

Saw maraykan ma ahayn
Fiidnaam ninkii miray
Saw maraykan ma ahayn
Falastiin ninkii madhay
Saw maraykan ma ahayn
Qudus kii mahoobiyay
Saw maraykan ma ahayn
Mulxidkii ciraaq jaray
Saw maraykan ma ahayn
Ka suuweeto maaruqay
Saw maraykan ma ahayn
Gaara naada kii miray
Saw maraykan ma ahayn
Baanama maskii galay
Saw maraykan ma ahayn
Ninka jaray mareegaha
Saw maraykan ma ahayn
Ka dhufsaday misciriraha
In maraykan xeerkiyo
Xuquuqaha dadka u simmo
Ninka moodayaw taa
Maad jirin gu' iyo laba
Xagguu jiray maraykaan
Markii shicibka mootiyo
Madfac lagala daallee
Maalootigii jiray
Xagguu jiray maraykaan
Markii shicibka miigiyo
Miiraajku toocshee
Maydku sheeda tuulaa
Xagguu jiray maraykaan
Markii mooradeenii
La mar-mariyay kaaraha
Xagguu jiray maraykaan
Markii Boqol magayda ah
Makastiyo caruuraha

Laga dhigay shuf iyo murug
In galbeed miciiniyo
Mukhlis iyo tol nooyahay
Ninka moodayow taa
Bal miliilic falastiin
Samra iyo shatiilaba
Malyuun baa lagawracay
Makas iyo caruuro leh
In galbeed miciiniyo
Dhibaad noogu maqanyahay
Ninka moodayaw taa
Malkadii baqdaadiyo
Beerihii furaad maye
Miigbaa dhex qaadoo
Waa danbas madaw iyo
Xinjir aan milmaynine

In galbeed miciiniyo
Diiqo noogu maqanyahay
Ninka moodayaw taa
Kashmiir mahadhadeedaa
Naftu muusanawdaa
Waa la mooraduugoo
Boqolaal magaydaa
Jeel lagu maxbuusoo
Manfacoodu ude yahay

In galbeed miciiniyo
Mukhlisiyo tolnooyahay
Ninka moodayaw taa
Boosniya ma'moog tahay
Inta gaalo magacliyo
Murtad baa ku xayatoo
Siddii midhihii doocaan
Dharaar baa lamuudsaday
Malkadiyo rugtoodii
Waa laga midhtirayaa
Haddaan mawlahay bixin
Emnastiidi murankiyo
Maxaabiis udoodadi
Xageebay kumaqan tahay

Ragbaa mooyo qooqaal
Musku dhuumanaayoo
Raba inay miskeedaan

Mar labaad hasheenee
Taa miyaan kayeelnaa
Baarliin marbay ahayd
Madal laygu iibshaye
Mawdbaan kaxigayaa
Mar labaad in laydago
Magli lay afeeyaa
Maqlayaa rigtiisoo
Midaa layla sugayaa
Seexo miyaan ka yeelaa

Isticmaarkii mamayee
Muuf nidhi sitiinkii
Isa soo mal-mala oo
Kaanbeeganbaa miis
Maantana dultaaloo
Musku wuu sanqadhayaa

Wuxuu maagan yahay waa
Ciiddeenan mudanka ah
Innuu naga mahoobiyo
Wuxuu maagan yahay waa
Dahabka iyo maadhkiyo
Macdanteenan hodan ka ah
Inuu xeel kumaamulo
Ninku waa macaash doon
Wuxuu maaganyahay waa
Inuu reer majuusiyo
Yuhuud noo muquunshoo
Uu midiidin naga dhigo
Muslinoow laguu sheeg
Allahayoow kamarag noqo
Geerida murwaadka leh,
Muslim kama cabsooddee,
Ninkii mawd hayoow keen
Cag weynow maroodiga
Mas laayaanabaa dila
wiyil maara diidaba
Gantaal baa umeel yaal
Geri waayo meeraba
Adammaa maruun hela
Maajeenta qarafiyo
Midhuunbaa kutuuraa
Unisom horaysiyo
Unisom danbaysiyo
Waligoodba magaciyo

Hay`ad aan midhqaban iyo
Hay malamaleeyaan
Waa midab shabeeleyn

Wiligoodba maamiyo,
Hadba macatab xaradhliyo
Haayad aan midh qabiniyo,

Shinbir- malab sideedii
Hayska kay dhexmeeraan
Waa sahan imirayiyo
Masaawaad ujeeda leh
Waligoodba qiilmadhan
Qosol meelna aan jirin
Foolka hayga muujeen
Waa gabarey maanyiyo
Dayo maadaheedii:

Axmed Aw-geedi waxa uu ka qayb galay dhawr sil-silladdood oo caan ah waxase ugu mug weyn silsilladda la yidhaahdo"*Alif-lay*", oo uu ahaa bud-dhiggii bilaabay, ee balaysinka u ahaa in ay furanto sil-silladdaasi, waxa ka qayb qaatay rag door ah oo laga yaqaano dhammaan Somaliland, ilaa 10 qof ayaa ka qayb qaatay sil-silladaasi. Waxa ka mid ahaa raggii doorka ahaa ee ka qayb qaatay sil-silladdaasi sidan:

*1: Axmed Aw-geedi "Dheeraad"*
*2: Cabdiraxmaan Sh. Cilmi Faahiye" Shamax"*
*3: Warsame Muxumed Warsame*
*4: Axmed Collaad Digaale"Qorrane"*
*5: Cumar Maxamed Maxamuud'Booshari"*
*6: Maxamed Xaaji Cali*
*7: Xasan Cabdi Madar*
*8: Saleebaan Carab Aw Saciid"Khuburo"*
*9: Maxamed Maxamuud "Dhago-cune"*

Waxa uu Axmed ku lahaa sil-silladdaasi hal maanso oo dhaxal-gal ahayd. Waxa ay ku bilaabmatay sil-silladdani, ka dib markii uu waraysi siiyay laanta Af-soomaaliga ee idaacada **BBC-**da, abwaanka caanka ah ee *Cabdi Aadan Xaad "Qays*", waxa uu waraysigaas Cabdi Qays laga waraystay heeso iyo maansooyin door ah oo uu leeyahay, waxase ugu layaab badnaa marka uu ka waramayaayey, heesta la yidhaahdo "*Awliyo Allay Adeeg*", oo uu ku dooday in Awliyadu ay isku xidho Alle iyo bini-aadamka, tahayna tiirka u dhaxeeya .Ka dib waxa ka dhashay muran iyo maansooyin badan oo lagaga soo hor-jeedo abwaanka, waxaana ay gashay in ay aakhirkii noqoto sil-sillad, oo ragna ay ka soo hor jeedaan, ragna ay xagga Qays raacaan. Axmed Aw-geedi waxa uu markaasi isku dayay in uu jawaabta ama naqdiga heestaasi uu u gudbiyo abwaan Qays, taasi waa suuroobi weyday, aakhirkiina waxa ay noqotay in uu ku soo qoro maansada jawaabta ah wargayska *Jamhuuriya* oo ka soo baxa magaalada Hargaysa. Ka dib waxa ka dhashay maansadii

Axmed uu ku naqdinaayey heesta Cabdi Qays in si dag-dag ah looga soo jawaabo, waxaana jawaabtiina lagu soo qoray caddadkii xigay kii Axmed ku soo qoray wargeyska. Abwaan Axmed Aw-geedi waxa uu ka mid ahaa raggii dhalliilsanaa heesta "Awliyo Allay Adeeg" ee Cabdi Qays, waxaanu sil-silladdan ku lahaa hal maanso, oo la yidhaahdo "*Kuwa nool ergo u diro*", waxa ka mid ahaa eryada maansadan sidan:

"Nin illaah ka maarmaa
Odayaal xijaabtiyo
Awliyo u yeedhoo
Qabri ku ag wareegee
Alla kaliya weeyaan
Cirka kii abuuroo
Alle kaliya weeyaan
Dhulka kii asteeyoo
Alle kaliya weeyaan
Ka adoomo looyahay
Ma illaah kalaa jira
Duco kaa ajiiboo
Ma illaah kalaa jira
Baryo kugu arsaaqoo
Ma illaah kalaa jira
Ajashaada siiboo
Ma illaah kalaa jira
Uur kugu barbaarshoo
Ma illaah kalaa jira
Anfaaciga ku siiyo
Ma illaah kalaa jira
Oo adoomo loo yahay
Taasi waa andaad iyo
Ishraak iyo asnaamaad
Illaahay u yeeshaye
Ashahaado soo celi
Ka nasahan illaahay
Awloo wakiishee
Kuwaad uubatayneed
Noo adeega leedahay
Inay olol jaxiimiyo
Edeg naara joogaan
Iyo inay janada udug
Xuural cayn arooseen
Sideed uba ogaatood
U hesheen akhbaartaa
Aakhiro mataarbaa
Adi kuugu xidhanoo
Qaybkaad ogsoontahay?
Lafo uu aboor cunay

Nin ka oohin maqashii
Af mugii la yeedhow
Ambad baad tahee toos
Adoon dhaadhacoo tagay
Iil kiyo xabaalaha
Inkastood uyeedhood
Ohow toosa leedahay
Ku ajiibi maayoo
Abid kuma maqlaayee
Alle hayse seegina
Duubi ciid ku aasmoo
Awaaraha ku raaggoo
Qabri lagu ilaawiyo,
Mayd lama ilaaqee,
Kuwo nool ergo u diro,
Iyagaa awood lehe,
Nabigoo ayaan qudha,
Inta uu xabaal tagay,
Xawaal gees istaagoo
Oo yidhi awoowow
Nasri adigu noo hidi
Ilaahbaan ku dhaartee
Inaan axadna sheegine
Intaan mowd idiin iman
Xaqa maa abaar taan
Miyaydaan aqoon diin
Andacood mafiicnee
Wixii kaa ishkaal gala
Halaguu iftoodee
Culimada usuushiyo
Aqoon yahanka waydii
Hadday duulal aasani
Inoo hiilin karayaan
Uxud iyo xunayn iyo
Asaayihii tabuuk dhacay
Mabay dhago adkaadeen
Hadday duulal aasani
Inoo hiilin karayaan
Xandaqii adkaayee
Lagu oofa beeley
Jignayaal afbadan iyo
Agab keeni laayeen
Hadday duulal aasani
Inoo hiilin karayaan
Yuhuud baan ka oriseen

Aqsa dacaladeedoo
Abi bakar sadiiq iyo
Xafsa aabeheed iyo
Calaa soo ekayn laa
Weerar lagu idlaadoo
Khaalid baan ka ooleen
Arimaha jihaad koo,
Asxaabtii Rasuulkaa
Adduun yada dhammaanteen,
Afarteeda waaxood,
Ololaha ka shabin laa
Awliyadu ma dhimatiyo
Arbacay kulmaan iyo
Islaamaha ku badawsada
Waxaan diintu nagu odhan
Inta geed magaaliyo
Abuurka iyo dhuuniga
Illaahbaa nasiiyoo
Axad kale ma tuugnee
Isagaa na kaafiya
Nimcoolayda adhigiyo
Ishinkiyo ladda u badan
Illaahbaa na siiyoo
Axad kale ma tuugnee
Isagaa nakaafiya
Ilaha wada burqanayiyo
Xareedaan ajoobayn
Illaahbaa nasiiyoo
Axad kale ma tuugnee
Isagaa na kaafiya,
Naacawda udugiyo
Carfigiyo il-dooga leh
Illaahbaa nasiiyoo
Axad kale ma tuugnee
Isagaa na kaafiya
Dhaayeheena aragiyo
Dhugashada iftiinshee
Dhagta maqal adeecdee
Durbaanada awooda leh
Rakaadadu abhinayaan
Illaahbaa nasiiyoo
Axad kale ma tuugnee
Isagaa na kaafiya
Eebbow ma aan arag
Sida ay u eegtiyo
Aakhiro rugteedee

Adigaa rumee yidhi
Ana waan adeecee
Rabaw adiga mooyee
Alle kale ma uu jiro
Eebbow ma aan arag
Ololka iyo naartiyo
Albaabada saciiree
Abeesadu u hoyatee
Adigaa rumee yidhi
Ana waan adeecee
Ha igayn allahayow
Eebbow ma aan arag
Ilihii naciimiyo
Udugiyo raaxada
Carfigiyo ildooga leh
Sida ay u eegtee
Adigaa rumee yidhi
Ana waan adeecee
Hayga qadin allahayow
Eebbow ma aan arag
Malaa'iigta amarkiyo
Cibaadada adkaysee
Adigaa rumee yidhi
Ana waan adeecee
Haygoyn allahayow

Dhanka kale kuma koobna barriga oo kali ah arrimaha ka dhaca in uu ka maansoodo abwaan Axmed Aw-geedi , waxa u dheer maansooyin badan oo aad la dhacayso sida uu u sharraxaayo badda iyo khayraadkeeda. Maansdan la yidhaahdo "*Tawaawac Baddeed*" waxa ay ka dhalatay ka dib markii uu dadku khayraadkii badda la soo baxi waayay kana faa'iidaysan waayay manaafacaadkeeda. Dhanka kale waxa maansadu si fiican inoogu sharraxaysaa in baddu ay ka cabanayso dawladdo shisheeye oo ka dhigtay meel khashinka lagu qubo oo baaldi xashiish oo kale ah, iyada oo baddu waxaasi iyo wax la mid ah oo dhib ah u sheegaysa dadkeeda ayaa uu Axmed si fiican oo farshaxannimo leh uu inoogu soo gudbinayaa. Maansadan "*Tawaawac Baddeed*", waxa ay ka mid tahay maansooyinka uu abwaanku u sameeyay qaab ruwaayadeed, waxaanay soo koobaysaa mushkiladaha ka jira badda iyo ka faa'iidaysigeeda laga qatan yahay, Waxa ka muuqata in daraasad cilmiyaysan ay tahay maansadani oo aan la iska alifin oo kali ah ee la baadhay wax badan.
Haddii aan idin soo gudbiyo tuducyo ka mid ah waxa ay odhanaysaa sidan:
"Baddaa oydoo na tidhi
Badbaadaan doonayaa
Dadkaa ii baahanow
Waheey birmad baan rabaa
Baddaa oydoo na tidhi
Waxaan ahay baylah quban

Khayraadkaygii bilaa
Darbaa bililiqo ku raray
Doonyaa laygu boobayaa
Badaawiyo bawdyo gaab
Jabaan bakhti hiigayiyo,
Bahdii Siiralaanka iyo,
Ya'juujiyo beel jiniyo
Jaynaha booliga ku mamay
Daray balanjadi ku taal
Khawaajaa ii balamay
Kaluunkaygii bilaa
Bayaadkiyo deeraggii
Saynuu loo baahda iyo
Tabaaddiin loo bogiyo
Amase baxsanow taqaad
Qubadii boob lagu casee
Maraakiib booliyaa
Baroosinka laygu xidhay
Baddaa ooydoo  na tidhi
Baaruud nugliyeerahiyo
Hadhaaga is biirsadiyo
Beley igu aasayaan
Baxaaliga mawjadiyo
Biyahaygii wacnaa
Ajiyo biirbey noqdeen
Baddii baa dhaadatoo
Bayaan bay waxay u tidhi
Waxaan ahay beer masno ah
Waxaan ahay boqol halaad
Waxaan ahay baarax geel
Waxaan ahay ibo burqaday
Waxaan ahay xabag barsheed
Kuwii I bog dooxan laa
Beerkay gaajo u hurdaan
Aheey badownimo xumaa
Beerkayga waxa ku jira
Buruud iyo dheeman iyo
Dhiraha yaaquud la baxay
Waxa iga buuxa dahab
Waxaa bedenkey ku deden
Batrool iyo gaas huroo
Waxaan ahay beelo deeq
Bogeyga waxaa ku wadhan
Hilbii la bisleeyey iyo
Kaluun boqol nooc ahoo
Waxaan ahay baylah tira

Baddaa talisoo na tidhi
Bilaash baad ii nacdeen
Haddii basan baas ka dhaco
Dhulkaad ku bashiishateen
Amaba xooluhu baxaan
Anuun baa baaqiyooo
Keydkii beri baan ahee
Bal may I badbaadiyaan
Babawyada iga hiraan

Abwaan Axmed Aw-geedi waxa aad la yaabaysaa sida maansooyinkiisu ay qaaliga u yahiin. Tii aad soo qaadaaba ka daran ta kale. Haddii aan marag idinka noqdo intii aan akhrinaayey maansooyinka abwaanka kuma arkin wax laga xumaado, ama aad yara dhibsato, maansadii ama heestii aad soo qaadaaba dhiigga ayay ku dhaqaajinaysaa, waxa aan aad ula yaabay sida dhaqanka iyo hidduhu ugu dheer yahay abwaanka. Ka sii darane haddii uu dhulkii, baddii, xoolihii, dadkii, dhammaan waxa loo gabyo ama loo heeso u heesay abwaanku, haddana waxa jira mid muhiim ah oo aanu illaabin. Dalxiisku waa meelaha ugu badan ee ay dawladdaha horumaray ka helaan dhaqaalaha, haddaba Axmed Aw-geedi isaga oo u sheegaya dadweynaha dunida ku nool in dalkeennu uu ku habboon yahay dalxiiska, waxyaabo badan oo dunida laga helina uu leeyahay ayaa waxa uu maansada la yidhaahdo "*Dalxiis*" si qoto dheer ugu faah-faahinayaa deegaankeena iyo sida uu ugu habboon yahay dalxiiska. Haddii aan idin soo qabto tuducyo ka mid ah maansadaasi waxa uu yidhi:

"Haddii dunida qaarkeed
Baryo loo dalxiis tago
Wax ka mudan dalkeenee
Aan ku daadaheeyee
Daymadaada maad Bogan
Degihii hebeer iyo
Hegaboo dul iyo daaf
Daraf iyo ilaa daraf
Dirir gaaxsanaa iyo
Dulka hoor warmeeyuu
Toddobaad ku maaxdumay
Oo mayey dihnaa iyo
Miiraa ka daba yimi
Gabalkii danbe uriday
Dabadeed gudguduhuna
Maalaa daqiiquu
Waagu ugu daalacay
Oo dayr hillaacdiyo
Deydada biyaha badan
Guna aanu daba Marin
Oo dooxadii guban
Daacul iyo maaraan

Galli jebiyay daadkii
Oo raha dibboodhiyey
Luuqdiyo durbaanada
Dadku seexan waayeen
Oo geel jir dirisiqay
Dardhaduu habeenkii
Dab jeexeen ardaayada
Oo duudka buuraha
Dixidiyo sifaarkii
Faraqa isku duubteen
Oo golis dusheedii
Dhirtu dookh macaaniyo
Daymo gaara leedahay
Oo daray magooliyo
Dayibkiyo hareerigu
Dusha ubax ku yeesheen

Oo dhebiga deynkiyo
Isdul baxay madheedhoo
Hoobaan ku doog saday
Oo dhabaqu dayrtii
Soo daacay malaboo
Sida xabag barsheed da`ay
Oo xamudhka daatiyo
Like dabed usoo baxay
Dabagaale ka hirqaday
Oo dugul karreeb ihi
Iyadoon burqudha deyin
Fataheen danbeedadu
Oo igadh mar curad dihin
Daba dhoon salaaxuu
Ka dafsiiyay jaarkii
Oo baarqab deeblihi
Intuu doobta soo riday
Ka dideen shinbirihii
Oo qaalmo deercadoo
Abasaxay degii hore
Degta gooja saareen
Oo koranki dabarkiyo
Laga daayay seetadu
Dulaha u mirood tegey
Oo maqashu daaqiyo
Weli debed u bixinoo
Qaadhku u dugsoon yahay
Oo daylo naysheed
Ku dul weehanaysoy

Daba rogan mareegtii
Oo degelka wayluhu
Durduro u dhamaatoo
Soo daba shabeelleeyn
Oo dibi tabaadiday
Geesaha is dareenoo
Dhulka daaqsin jeexeen
Oo cuudki daran iyo
Gulaan lagu dabaaloo
Ka dawoobay jeelkii
Oo dulin dhibiiqiyo
Faradheer dilaacdiyo
Hulunbuhu danbaabidhin

Oo darato jaaniyo
Sanbab laga ducaystiyo
Laga dayrey aafaad
Oo aan dad qaadiyo
Aarkii dabooliyo
Dacaw laga mildhaaweyn
Oo digirin kurusiyo
Galawgii digriyi jiray
Daanshoonayaan kibir
Oo dareemo mooyee
Diinkii carmada nacay
Ku caweeyay doomaar
Oo marista duushaa
Intay daadah kugu tidhi
Ku dulgeysay doocaan
Dul ahaan ugaadhuna
Iyadoon dareen qabin
Dugsaneysa xoolaha
Oo wiyeer durduurliyo
Dhane duunyo loo horo
Darmijoole lays nacay
Oo gacal is daystoo
Ina aan dareen jirin
Cidina is danqaabayn
Oo dayax habeennimo
Hurdo dakhar ka toosuu
Soo direy falaadhaha
Xidiguhu damaashaad
Intay farax la deexdeen
Daareen ifkoodii
Dabadeed cadceeduna

Inta ay ka daba timi
Dusha laga ilaaqtamay
Oo daan cirooliyo
Duqaydiyo waxgaradkii
Duleedada ku shirayaan
Dayartiina cuudiyo
Cadalool ku daahdooy
Bardoodidey saqii dhexe

Oo dumar kabdii iyo
Falkiyeen darfooley
Jiibta isla doonteen
Oo harraro duubnaa
Todobaale daabacan
Hadba midab kadoorteen
Oo udubo duban iyo
Dhigahoo jil lagu dahay
Loolkii dulquban yahay
Oo laba daryaaliyo
Aqal daahyo weynaa
Dudadii ka taageen
Oo duleedka sacabiyo
Ciyaar loo daleeyoo
Aroos loo dabaal degey
Oo duhur gamaankiyo
Farduu deedameenoo
Ishu daawasho u timi
Oo doobkii guursaday
Yabadh loogu deeqoo
Kadimo uu dareersaday
Sodohdiina diiqiyo
Fujaan dabaqu saaraa
U daruurtay gabadheed
Dadba waa lamaanee
Dalka aan tilmaamiyo
Deeqdaa layaabka leh
Inagoo ul iyo diir
Dermo qudha kuwada nool
Daayin haysku keensimo

Abwaan Axmed Aw-geedi waxa ay isku barteen halgankii rag badan oo door ah, oo suugaanta soomaaliyeed baal dahab ah kaga jira, ka dib halgankii markii dalka la soo galay, waxa kale oo ay isla jaan qaadeen rag kale oo iyaguna suugaanta caan ku ah, abwaan Axmed Aw-geedi waa shakhsi u heelan sidii uu u horumarin lahaa Suugaanta iyo dhaqanka suuban. Kama maqnaado masraxyada lagu soo bandhigaayo suugaanta, hiddaha iyo dhaqanka, waxaana markhaati cad

kaaga noqonaaya sida aanu Axmed Aw-geedi uga maqnayn ku hal-qabsiga maansooyinka la soo bandhigaayo oo dhan. Haddii aan si dul ka xaadis ah idinku soo gudbiyo intii aan daraasada ku sameeyay ee aan helay ee hal-qabsi ah, waxa aan jeclahay in aad ila wadaagtaan intii aan soo helay ee ah hal-qabsigaa, ay ku hal-qabsanaayeen abwaanno door ahi:
Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi", ayaa waxa uu gabaygiisii u dambeeyay ee "*Dhul-gariir*" uu ku bilaabmayay hal-qabsiga abwaan Axmed Aw-geedi, waxaanu yidhi Hadraawi:

"*Axmadow nin dheeraad sitoo, dhiibsan baad tahaye,*
*Tu kalaad u dhaaftaa markaad, dhaliso tii roone*.

Sidoo kale ayaa Maxmed Jaamac Gaaxnuug, uu in badan maansooyinkiisa uu ku hal-qabsanayaa, waxaana aan ka soo qaadan karnaa erayadan.

"*Meni qubatey Geedoow la' arag, qaadna wow sabab'e*

Sidoo kale ayaa Axmed Collaad digaale" Qorane, waxa uu isaguna yidhi:

*Axmed Geedi maansada,*
*Aflagaado kuma darin,*
*Wuxuu yidhi ogaalkey,*
*Alle keliya caabuda,*
*Isagaa awood lehe*,

Mar kale isaga oo Qorane ku hal-qabsanayaa waa kii lahaa sidan:

*Axmadow mudaan ka habranaa, hawlihii gabay'e*
*Ma haweysto maansada haddaan, waayo heyn jiray'e*

Sidoo kale ayaa isaguna abwaan Cumar Maxamed "Booshari" uu si fiican oo xarrago leh ugu hal-qabsanayaa abwaan Axmed Geedi, waxaanu yidhi Booshari:

"*Abwaankii bilaabiyo,*
*Axmed Geediyoow maqal*.

Sidoo kale ayaa qoraaga caanka ah ee suugaanyahanka ahi ee Xasan Cabdi Madar uu tix uu ku lahaa sil-silladdii "*Alif-ley*" uu isaga oo ku hal-qabsanaaya abwaan Axmed Aw-geedi uu yidhi sidan:

*Hadduu yidhi abwaankii,*
*Ina Geedi Maansada*.

Sidoo kale ayaa abwaan Maxamed Xaaji Cali isaguna tix uu ku lahaa sil-silladdaasi "*Alif-ley*" ee uu bilaabay abwaan Axmed Aw-geedi uu isaguna hal-qabsigan yidhi:

*Axmadoow amuurtaad,*
*Iba-bixisay adiguye,*

*Qoranana aqbaalee,*
*Cumar sii ayideybaan,*
*Anna rabay aqoontey,*
*Inaan sii iftiinshee.*

Sidoo kale ayaa abwaan Cabdiraxmaan Cawlo (Cabdiraxmaan Baqdaadi). Waxa uu maansadiisii u dambeysey ee badhtamahii sannadkan uu soo saarey ee jawaabta u ahayd gabaygii Hadraawi ee “Dhulgariir”, uu dar-daaran laxaad leh ugu jeedinaayey abwaan Axmed Aw-geedi in uu ka hadlo arrinta haybsooca ee lagu faqooqo dadka laga tirada badan yahay, isaga oo si gaara ula hadlaaya abwaanka waxa uu yidhi:

“*Ahmed geedina u yeedh,*
*Maansada gankeediyo,*
*U gu’ tiriya deelleey,*
*Yuu gabalku kaa dhicin,*
*Casarkana ha gaadhsiin*.

Maansooyinka Axmed Aw-geedi, waxa ku jira kuwa ugu caansan maansada la yidhaahdo*”Himilo”*, waa maanso runtii taabanaysa waayaha adduunka iyo sida ay tahay aragtida abwaanku, waxa ay soo baxday sannadkii 2000kii, waxa ay dhalliil toos ah u jeedinaysaa, xukuumaddii Maxamed X. Ibraahin Cigaal, waxa uu si togan iyo si tabanba uu u dhalliilayaa maamulkaasi. Dhanka kale waxa uu sharraxayaa dhaqankii door-soomay, iyo waxa badalay, dhanka kale waxa uu abwaanku sawir guud inaga siinayaa sida uu u arko mushkiladdaha ka jira dalka iyo dunida iyo halka uu ka taagan yahay isagu. Waxa ka mid ah tuducyada maansadan sidan:

“Himiloy lagu tooyey
Deegaaney lagu haybi
Hilaacoow lagu beegsay
Haleeloy lagu maal
Howraarey ku dhegeystey
Gabaw kuu hanqal taagay
Hantaa baa layska dhexlaaye
Hibo weeye tixuuye
Bal aan doono hoggeedoo
Hal abuurka u baaqo
Male waa hinbiriire
Yiqiin ka hagoogtey
Hungo weeye qabiile
Qaran baan ka hagoogtey
Dagaal waa mahanbeeyee
Nabad baan ka hagoogtay
Tafaraaruq hafeefleh
Middnimaan ka hagoogtey
Dulmi waa lagu hoogaye
Xaquun baan ka hagoogtey
Beeni waa hir iblayse
Runtuun baan ka hagoogtey

Soor quudheed helideeda
Sharaf baan ka hagoogtey
Kibir waa hungo jaane
Tawaaduc baan ka hagoogtey
Ceeb habeen gudinteeda
Sariig baan ka hagoogtey
Aarso maan hidin waayine
Dulqaad baan ka hagoogtey
Nacayb huurey walaaqna
Hoji baan ka hagoogtey
Xantu waa hilib daaqe
Xariirbaan ka hagoogtey
Bilo soo hudinteeda
Duqka dhexaan ka ahaan
Hal fudeydiyo ceebna
Waayeel baan ka ahaan
Tollaay reer hebelowna
Demanaan ka ahaan
Colaad leys hargo waaxi
Erguun baan ka ahaan
Danta guud hamigeeda
Darrbanaan u ahaan
Dugsiyeey ehebteena
Difaac baan u ahaan
Cadlii waa ma huraane
Deyruun baan ka ahaan
Geedigeenan hayaamey
Horseed baan ka ahaan
Cadligaa inna deeqee
Deyruun baan ka ahaan
Nin ibleys halabeystoo
Shaydaan heeryada saarey
Iyo taarik halaabey
Beri baan ka ahaan
Afartaa hogal roobiyo
Hilaacii karameed dheh

Birrtaan soofe hafeef leh
Lisin aan lagu hiigin
Saawir weyee huroowe
Miyaad maandhe hilmaami
Qoyskii aan hayin dooriyo
Koran heeryada saarin
Hayaankey ka hadhaane
Miyaad maandhe hilmaame

Wiilkii aan xamar heegliyo
Darmaan aan halabeysan
Duulaan kuu ka hadhaaye
Miyaad maandhe hilmaami
Dalkii waaya horseed
Hogaan maamul yaqaana
Dunidey ka hadhaane
Miyaad maandhe hilmaami
Dhaqaalahakan hagaasee
Hoosta ay ka cuneenee
Haawadee tarmi waayey
Ayax dool ku haraadiyo
Daani yaha hamka siiyoon
Cid hoy ka lahayn
Dhakhtarkeer isku huuree
Intuu hoos ka cadhoobey
Hulunbuhu ka dilaacee
Kud-kuduhu hoganaayee
Daryeel haygaba joogee
Hal kiniina oolin
Shaqaalaha hoganaayee
Hiraabtii safradoodee
Habeenkii macaluulee
Taano aan helihaynin
Looma waayin haduub iyo
Wax hamuunta ka biiyee
Hagrashaan u arkaa
Hidaheeni la tuur
Dhaqankeeni halow
Wanaagii la hilmaan
Samihii la hanboori
Sharafkii la hungee
Hilinkii laga leexey
Sharcigii la habaar
Hankeenii la tabcee
Hadhuubkeeni la xoor
Haamihii la dalooli
Hayinkeeni la gowrac
Hasheenii boqno gooye
Carsoorkii laga hoogyoo
Hoygii tuurta lahaa
Kawaan weeye hadeeroo
Nimaan duunyo huraynin
Ama beeso helaynin
Hadh cad baa laga eexdoo
Dulmi baa ka higleeyey

Dowlad hoose warkeediyo
Iyada daa hadalkeedoo
Haawataa la yidhaayoo
Halaqyey korisaaye
Ha hilaate`e daaya
Habaar waalid ma fiicna
Haadaan lays Kama tuuro
Lama Haybsho balaayo
Halfudeydna ma toosna
Hayinkaad raranaysiyo
Hashaad maali lahaydna
Dugaag loogama hoydo
Hablihii asturaayee
Hoyga aan kabaxaynin
Hoobal baa u dhawaaqoo
Heerin bay ku jabeene
Tolow yaw gacan haadshoo
Hagoogtoodi ka qaadey
Ummaddii hanka toosan
Hiddaheedu ahaaye
Baryo aan hilineynin
Shaxaad bay u horeenoo
Sharafkoodii halawye
Tolow yaa hoga seejey
Hudheelada la yaqaanee
Ciirta ay ku hayaanee
Habeen laysugu yeedhiyo
Inta hoy macsiyeed ah
Haddaan loo hargo waaxin
Ama heedhe la duubin
Sow halaagsami mayno
Aduun waa la hellaaye
Haday diintu halowdo
Sow halaagsami mayno
Afartaa sange huufliyo
Gaammaan heenso la saariyo
Ashkir taagi halqooqiyo
Baroor haad la cayaariyo

Siyaasad aan mabda heynoo
Aan hogaamin dastuurku
Hal bacaad lagu dhiijiyo
Waa habaas saru duuley

Ma hogaano sameey
Wasiir reer hebel siibaa
Himiloy lagu doogi
Golayaashan is hiifey
Hungurey isku qabteene
Danteenii ma hayaane
Iska dhaaf hadalkooda
Huuhaa dooda ka jeeso
Waxba haw hanqal taagin
Hanfadahay u jibootay
Haaba hawte lmadiile
Haraayuub iyo saaruq
Ma hanbeeyae aboora
Hororaan u aqaanoo
Shicibkey ka hodmeene
Tuke maaha horseed
Shan kastay halweynso
Ama ay godol hayso
Gabno soo horanaysa
Hadhuubo u culan mayno
Horey baaney aheyn
Hayin gaabsha Nin fuulay
Muduu soo hitiqshaayoo
Kabtiguu hadhayaaye
Ganayow iga hoo
Hayni wayga intaa
Hagarina wayga walaahi
Raga heesta yaqaaniyo
Hal abuurka u dhiib
Iyagaa hubin doonee!!

*"Beri-sammaad"* waa maanso kale oo ah maansooyinka uu abwaanku u qaabeeyey sidii qaab ruwaayadeed oo kale. Dhanka kale maansadani waa dhoola tus xagga afsoomaaliga ah, iyo sida uu abwaanku u yaqaan dhaqanka iyo suugaanta, waa maanso runtii qaabka ay u dhacayso aad aad u jeclaysanayso, haddii aad si fiican u dhugato, ama aad ugu luqeyso qaabka ay u dhacayso

Dayaxoo baraarugay laba badhkii
Xidigaha u baaqoo baadi goob
Cadceedoo bidh soo tidhi baal casey
Daruuruhu bishleenoo leys boqradey
Cirka oo bashiishtoo soo burqaday
Mayeygoo badweyntaa foos burburay
Dhibicoo bariiqdoo gees u baxay
Jeegaani badhaxdoo midabo badan
Hilaacoo ku beegmoo biligta guray

Onkodkuna bilkeyduu bigilka ridey
Daadkoo butaacoo boholo xuley
Baliyada xareedoo doog barkaday
Dhulka oo barwaaqiyo baad huwaday
Buska iyo awaarii reys bedeley
Buuflaha xagaa iyo bacadkii jabay
Berdahoo balaadhoo buleyga ridey
Lo'da oo banaaxidey beri samaad
Idahoo boqnaha sare soo barqaday
Riyahoo balaadh iyo buurta koray
Waxaraha bacdaray oo bicifka didey
Geeloo in badan iyo boqol ka dhalay
Ka reebkoo u beeraqay baal castii
Boga oo ku weehatey bawdka dheer
Boodaani danantoo bila ku xidhan
Banka qooqa baacsaday baar qabkii
Baw-bawle iyo koor beel la furay
Baashaalka goreygoo gees u baxay
Cawleey badhyo cad oo soo bidh tidhi
Biciidkuna ku dhawyuu baal mirtoo
Bakeyluhu burgaley uu baarax ledey
Bawnaha carceeroo bogox u kacay
Baqayaha ku loolamay calaha bari
Shimbiraha bul xamay oo buul ku jira
Dumarkoo baqbeenada boos ku shubay
Dadka oo badhaadhaha yidhi bilkheyr
Botorkiyo ciyaartii loo balamay
Bigil iyo wareegtiyo buun la tumay
Qalanbaawi boojimo booda gurey
Wiilashoo bilaawaha bidixda sudhay
Dhooreydu bihinbiha booli tidhi
Barbaartoo duleelada boota dhigan
Carruurtoo bacoodada baqayo bidhan
Aroosyadii la biley oo laysu bogey
Gacalkii is bogaadshoo yarad la bixin
Bunduqa iyo faraskiyo baarax geel
Gabaatiga ku biirsaday bilan nin dhalay
Beel daaje wiiliyo boqor fadhiyo
Bariidiyo salaaniyo bedesho tahay
Kebed iyo badhooqiyo baar leh caws
Dadab leysku booqdiyo orom la bulay
Alla beri samaadkii waw bogaye
Boholyow ma ii galay baledkayaga

Guntii iyo gab-gabadii waxa aan ku soo gunaanadayaa qoraalkan kooban ee aan idin soo gudbiyay, bushaaro ku saabsan in dhawaan la soo daabici doono buug ka hadlaaya sooyaalka suugaaneed ee abwaanka, waxaana buuggaasi ku hawlan oo gacanta ku haya saaxiibkay oo ah nin qoraa caan ah, kalsooni badanna ku qabo in uu buuggaasi noqon doono buug qiimo badan u yeesha ummaddeena jecel dhaqanka iyo suugaanta.

*Tixraac:*

- *Waraysi abwaanka ah*
- *Qoraallo uu abwaanku sameeyey, tirsigooduna yahay 1991-2007*
- *Deggelka www.redsea-online.com "Somaliland by Ahmed Aw Gedi"*
- *Deggelka www.aftahan.com "Suugaanta keydka by Ahmed Aw Gedi"*

Alle Mahad Leh

Khaalid Jaamac Qodax
Hargeysa, Somaliland
***Qodax02@yahoo.com***
**Qodax02@gmail.com**